# FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

## MINISTRY OF EDUCATION, CULTURE AND HIGHER EDUCATION

# TEACHERS' POLICY

**February 2021**

**HORDHAC**

Siyaasada macallinka waxaa loo diyaariyay hab ku dhisan wada-tashi oo ay ka wada qayb galeen dhammaan Waaxyaha Wasaaradaha Waxbarashada ee heer faderaal iyo dawlad goboleed iyo bahwadaagta Waxbarashada. Arrintani waxa ay ahayd dadaal iskaashi oo laga bilaabay in xog laga soo ururiyo dadka ay khusayso, sida macalimiinta, maamulayaasha, guddiyada waxbarashada bulshada (GWB), la taliyaasha wasaaradda iyo xeel dheerayaasha Waxbarashada, xogtaasi oo lagu dhisay diyaarinta siyaasadda horumarinta macallinka Soomaaliyeed

Sida ku cad qodobka 30-aad ee Dastuurka dalka, waxbarashada aasaasiga ahi waa xaquuq uu leeyahay qof kasta oo muwaadin Soomaaliyeed ah, sidaas darteed Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa loo xilsaaray inay bixiso waxbarasho tayo leh iyo tababar soo saara dad aqoon leh oo horumariya dhaqaalaha, bulshada, siyaasadda, nabadda iyo deganaanshaha dalka. Siyaasada macalinku waxa ay la saanqaadaysaa habsocodka sharciyada ee Wasaarada, Qorshaha Istiraajiyada Waxbarashada, Siyaasada Waxbarashada Qaranka iyo qodobka 4-aad ee yoolasha horumarinta waara ee Qaramada Midoobay.

**Ujeeddada** siyaasadda macallinka waa in la xoojiyo diyaarinta macalimka, iyadoo loo marayo tababarida macalimiinta shaqada ka hore iyo macalimiinta shaqada ku jirta oo si joogta ah loo tababaro iyo in la mideeyo shahaadooyinka iyo habka aqoonsiga oo horseedi doona hab-socodka diiwaangelinta macalimiinta iyo bixinta ruqsada macalinimada ee dalka oo dhan.

Halbeegyada lagu cabirayo waxbarashada tayada leh waxaa ka mid ah manhajka hadda laga dhigo dugsiyada, kaasoo la daahfuray sannadkii 2017, ka dib wada-tashiyo ballaaran oo ay ka wada qayb qaateen dhammaan bahwadaagta waxbarashada. Sidoo kale waxaa waajib ah in macallimiinta lagu tababaro sida loo gudbiyo manhajka qaranka.

Siyaasadda macallinku waxay ka qayb qaadan doontaa dhammaan xeerka diyaarinta macallinka iyo hanaanka lagu maamuli doono, sida diiwaangelinta iyo ruqsad siinta macallimiinta marka shahaado ka soo qaataan goobaha tababarada macallimiinta ee ay wasaaradu aqoonsan tahay. Waa in la suuro geliyo in sannadka 2025 aysan dugsiyada ka shaqayn macallimiin aan diiwaan gashanayn. Sidaas darteed waa in wasaaradda waxbarashadu ay fursado siiso macallimiinta aan horey fursad tababar macallinimo u helin. Sida caadiga ah, tababarku waxa uu macallinka barayaa aqoonta maadada iyo xirfada macallinka oo lagama maarmaan u ah in si waxtar leh uu macalinku casharka u gudbiyo oo fasalka u maamulo.

Waxaan rajaynayaa siyaasadda macallinka in ay keento hab iyo xirfad macalimiinta u suuro gelinaysa inay ka dhabeeyaan labada ujeeddo ee mataanaha ah oo ah kordhinta helitaanka iyo hagaajinta tayada waxbarashadada.

Mahadsanidiin 08/11/2021

***Eng. Xil. Cabdullahi Abuukar Xaaji***
***Wasiirka Waxbarashada, Hiddaha & Tacliinta Sare***

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha & Tacliinta Sare
Xafiiska Wasiirka
Office of The Minister
Ministry of Education, Culture & H. Education

**DULMAR KOOBAN**

Macallinku waxa uu laf-dhabar u yahay tayada iyo gubinta waxbarasho loo siman yahay. Sidaas darteed waxaa dawlada looga baahan yahay in ay hubiso waxtarnimada macallimiinta iyo hubinta macallin dhab ah uu caruurta waxbaro. Siyaasadda qaran ee macallin waxa ay la saanqaadaysaa qaab-dhismeedka, sharciga, manhajka dugsiyada, qorshaha istiraajiyada ee waxbarashada, iyo qorshaha horumarinta dalka si ay u hagto qofka macallin noqon kara. Nidaamka dawlada waxaa ka mid ah diyaarinta tababarka iyo sharuudaha tababarka. Macalimiinta waxaa loo tababarayaa labo hab oo kala ah: shaqada ka hore iyo shaqada dhexdeeda, mid kasta waxa uu leeyahay sharuudo lagu soo xulanayo macallimiinta. Sidoo kale waxa macallimiinta lagu tababari karaa iyadoo la adeegsanayo habka casriga ah ee fogaan-dersiga si looga hortago dhibaatada cudurka COVID 19.

Diyaarinta siyaasada macalinka waa mid laga wada talogeliyey dhammaan hab-wadaagta waxbarashada ee dawlad goboleedyada, dalladaha waxbarashada iyo shaqaalaha wasaaradda federaalka magaalada Muqdisho. Siyaasadani waxa ay ka kooban tahay hagid iyo talooyin ku saabsan: Maamulida/maareeynta hannaanka macallinka, diiwaangelinta, ruqso-siinta, mushahaarka, shaqaalaysiinta, hawl-gelinta, iyo arrimo kale oo la xiriira shaqada macalinka sida xeerka hab-dhaqanka macallinka.
Waxa jira talo soo jeedin ku saabsan heerarka macallinka, taasoo hagaysa heerka mushahaarka macalimiintan heerarkoodu kala duwan yihiin. Helitaanka shahaadooyinka, dhinaca aqoonta iyo xirfada waxa ay macalimiinta ku dhiirigelinaysa inay galaan tababar kor u qaada aqoontooda iyo xirfadooda.

Siyaasaddani waa mid ku haboon qaybaha dalka oo dhan, waxaay wadataa shuruuc iyo habraacyo hagayo maareynta iyo maamulidda macallimiinta meel ay joogaanba.

Ugu dambayntii, siyaasadda macallinku waxa ay soo jeedineeysaa la qorsheeynta, qiimeynta iyo daba galka dhammaan heerka kala duwan. Waaxda horumarinta adeega waxbarashada waxaay diyaarinaysa qorshaha fulinta siyaadada macalinka, si agaasimaha guud iyo wasiirka wasaaradda aay raadiyaan dhaqaalo lagu fuliyo siuyaasadda si u hubiyaana in la ta siyaasadda caruurta Soomaaliyeed ay waxbarasho heleen.

**TUSMO**

**ARAR** ........ Error! Bookmark not defined.

**DULMAR KOOBAN** ........ i

**CUTUBKA KOOWAAD** ........ 1

**HORDHAC** ........ 1

1.1 Siyaasada Macalinka Xilliga Xaaladaha deg deg ah iyo Xanuunada Saf-mareenka ah ..... 2

1.2 Nidaamka Waxbarashada ........ 2

1.3 Helida Waxabrashada iyo Tayada Waxbarashada ........ 3

CUTUBKA LABAAD ........ 5

DIYAARINTA MACALINKA ........ 5

2.1 Muqrarka Tababarka Macalinka ........ 5

*2.3 Tababarka Macalinka* ........ 6

2.4 Sharuudaha Xulashada Macalimiinta la tababarayo Shaqada ka hor. ........ 7

2.4.1 Sharuudaha Tababarka Macalimiinta ee Shaqada ka hor ee Dugsiyada Hoose/Dhexe ........ 8

2.4.2 Sharuudaha Tababarka Macalimiinta Shaqada ku Jirta ee Dugsiga Hoose ........ 8

2.5 Sharuudaha Xulashada ee Tababarka Macalimiinta ee Dugsiga Sare ........ 8

2.6 Waxbarashada loo Wada Dhan yahay ee Tababarka Macalimiinta. ........ 9

CUTUBKA SADDEXAAD ........ 10

Dhinacyada Maamulka Siyaasada Waxbarashada ........ 10

3.1 Siyaasada Diiwaangelinta ........ 10

3.1.1 Sababayn ........ 11

3.1.2 Ujeeddooyinka Siyaasada ........ 11

3.1.3 Baaxadda iyo Tusaalaynta ........ 11

3.2 Siyaasada Shaqaalaysiinta ........ 12

3.2.1 Baaxadda Siyaasada ........ 13

3.2.2. Aasaaska Siyaasada ........ 13

3.3. Hawl-socodka Shaqalaysiinta ........ 13

3.3.1 Tilmaamaha xukumaya habsocodka shaqaalaysiinta ee lagu sharxay jaantuska 1 sida hoos ku qoran: ........ 14

3.4. Dukumiintiyada: ........ 15

3.5. Istiraajiyada Shaqalaysiinta ........ 17

3.7. Siyaasada Mushahaarka Macalimiinta ........ 17

3.8. Heerarka Mushahaarka ........ 18

3.9. Siyaasada Hagaysa Mushahaarka Macalimiinta ........ 18

3.9.1. Heerka Mushahaarka Macalimiinta ........ 20
3.9.2. Gunnadda ........ 20
3.9.3. Fulinta Siyaasada Mushahaarka ........ 20
3.9.4 Siyaasada Dalacsiinta Macalimiinta ........ 20
3.9.5 Hogaaminta iyo Maamulida Dugsiga. ........ 21
3.9.6 Siyaasada Bedelka ........ 22
3.9.7. Rukhseysi( iscalidda macallinka) ........ 23
3.9.8. Fasaxa Dugsiyada. ........ 23
3.9.9.1 Hab-dhaqanka Macalinka ........ 24
3.9.9.2. Dawrka iyo Mas'uuliyahada Macalinka, Ardayga, Waalidka ee siyaasadaan ........ 25
A) Macalinka ........ 25
B). Maamulaha Dugsiga ........ 25
C) Ardayda ........ 25
D) Waalidka ........ 26
E) Guddiga Anshaxa ........ 26
3.9.9.3 Ka Joojinta iyo Ka Eryida Shaqada ee Macalinka ........ 27
A) Tilmaamha Anshaxmarinta Macalimiinta ........ 27
3.9.9.4. Xubinnimada Macallimiinta ee Ururada Shaqaalaha. ........ 27
3.9.9.5 Fulinta Siyaasada Macalinka ........ 28
4.0. Gabogabo ........ 28
Tixraacyada ........ 29

# CUTUBKA KOOWAAD

## HORDHAC

Waxbarashadu waa agab awood u leh horumarinta bulsho, dhaqaale iyo kobcinta aqoonta iyo xirfadaha bulshada, waxaana jira xiriir ka dhaxeeya waxbarashada iyo dadka aqoonta leh oo looga baahan yahay horumarka. Waxbarashada waxaa loo adeegsan karaa in la yareeyo faqriga, la horumariyo sinaanta, nabada, deganaanshaha iyo kor-u-kaca bedqabka caafimaad ee bulshada. Si kooban waxaa loo oran karaa:"Waxbarashada waa hubka ugu weyn ee dunida lagu bedeli karo". Si loo gaaro yoolashaas, waa in aan nidaamkeena waxbarashada cusbaysiinaa oo dib-u-qaabayn ku samaynaa, taasoo kordhinaysa helida waxbarashada, tayada waxbarashada, iyo xoojinta awooda sida caruurta wax loogu gudbinayo.

Horumarinta waxtarnimada iyo wanaaga macalinku waxay ku xiran tahay kartida dadka dooranaya xirfada macalinimada. Wasaaradda waxbarashadu waxay aqoonsan tahay in macallimiinti ay laf-dhabar u yihiin gudbinta waxbarasho tayo leh oo ka shaqaysa dhammaan dawlad goboleeyada sida: Galmudug, Hirshabeele, koonfur-galbeed, Jubaland, Puntland iyo Somaliland.

Siyaasada macalinku waxa ay ka kooban tahay xeerar qaabaynaya horumarkinta macalimiinta dalka iyo waxa ay qabantaan. Samaynta siyaasada macalinku waxa ay ku dhacday hab isku xiran oo iskudhan marka loo eego siyaasada waxbarashada dalka, xeerka waxbarashada dalka iyo qorshaha horumarinta dalka. Siyaasada macalinku waxa kale oo ay ka talo bixinaysaa sida loo gaari karo yoolka 4-aad ee horumarka waara ee qaramada midoobay oo ah "***hubinta waxbarasho loo wada siman yahay oo loo wada dhan yahay, si kor loogu qaado fursad ay dadku wada helaan oo ay wax ku barta inta ay nool yihiin***" ***(UNESCO, 2015).*** Sidoo kale, waxaa siyaasadaan hagaya aragtida, fariinta iyo qorshayaasha wasaaradda waxbarashada. Xeerarka siyaasadan waa kuwo ku haboon dhammaan qaybaha dalka oo ay ku jiraan dawlad goboleeyada, iyada oo aan cidana laga soocin.

Wasaaradda waxbarashadu waxay aqoonsan tahay in macalimiintu ay laf-dhabar u yihiin tayada iyo u sinaanta waxbarashada ee caruurta oo dhan, maadaama ay dugsiyada saamayn ku leeyihiin natiijada waxbarashada ardayda. "Waa in la hubiyaa arrintaas sannadaha soo socda oo macallimiinta la dhiirigeliyo, oo si ku haboon loo tababaro oo la siiyo shahaado xirfadeeday taageerayaan maamulka iyo nidaam wanaagsan" (UNESCO,2015).

Marka la tixraaco xogta aan dhammaystirnayn ee EMIS, waxaa gobolka bannaadir macalimiin ka ah 8,681 macalin, koonfur-galbeed: 3,212 macalin, Galmudug 1,429 macalin, Hirshabeele 1,150 macalin iyo Jubaland 2,008 macalin oo wadartoodu tahat 16,480 macalin. Puntland: 6511 macallin ( Pl EMIS 2018/19).

Sida ay sheegayso warbarinta ESA 2017, macalimiintaasi kama jawaabin baahida ardayda dugsiyada hoose/dhexe iyo kuwa sare. Caqabadaha ugu waaweyn waa in aysan macalimiintu lahayn xirfada wax barista iyo aqoonta maadada, taasoo macnaheedu yahay inay saamayn toos ah ku leeyihiin tayada wax barashada ardayda. Si caqabadaas looga gudbo, wasaaradda waxbarashada waxay tababari doontaa ku dhowaad sideed kun oo macalin lixda sanno ee soo socota, iyadoo tixgelinta la siinayo macallimiinta aan tababarnayn si loo hormariyo aqoontooda xirfada wax barida iyo aqoonta maadada.

Dawladu waxay hadda dib-u-habaynaysaa waxbarashada, iyadoo la xoojinayo nidaamka waxbarashada dugsiyada dawlada, kuwa bulshada iyo kuwa gaarka loo leeyahay ah, oo macallimiinta shaqaalaysiista xeer la'aan. Wasaaradda waxbarashadu waxay horey u qaaday tilaabo ay ku shaqaalaysiinayso macalimiinta wax ka dhiga dugsiyada dawlada oo waxay ka hawl gelisay gobolka banaadir iyo dawlad goboleedyada. Macallimiinta shaqada la qorey waxaa laga diiwaangeliyey guddiga shaqaalaha rayadka ah, iyadoo la ilaalinayo xuquuqdooda iyo shuruudaha shaqaalaha. Hadda waxa ay wasaaradda waxbarashadu samaysay Nidaamka Maamulka Macalimiinta, kaasoo qayb ka ah nidaamka guud ee Maamulida Xoggta Waxbarashada, taasoo taasoo taala xarunta dhexe ee wasaaradda waxbarashada.

Siyaasada macalinku waxa ay ka jawaabaysaa su'aalaha ah: "Waa kuma macalinku? Waa maxay shuruudaha looga baahan yahay in la noqdo macalin dugsi hoose/dhese ama macalin dugsi sare? . Siyaasadaankama talo bixinayso macalimiinta xadaanada, dugsiyada farsamada iyo tacliinta sare sida kuliyadaha tababarka macalimiinta. Siyaasada waxaa si wada tashi ah uga qayb qaatay samaynteeda shaqaalaha wasaaradda waxbarashada, macalimiiinta shaqeeya, macalimiintii hore, dad khibrad u leh waxbarashada iyo shaqaalaha wasaaradaha waxbarashada ee dawlad goboleedyada.

Si loo hubiyo wartarnimada barista, wasaaradda waxbarashadu waxay ku talinaysaa in macallimiinta khibrada badan leh ay wax u dhigaan dugsiyada hoose si loo hubiyo xirfada aasaaska sida akhriska iyo qorista iyo xisaabta in lagu bartay fasalada hoose. Dhinaca kale, wasaaradda waxbarashadu waxa ay soo jeedinaysaa in halkii macalin uu wax u dhigo 40 arday dugsiga hoose, dugsiga sarena 35 ardayda uu wax u dhigo halkii macalin. Tani waxa ay hubinaysaa in ardaydu ay la socdaan dareenka macalinka ee fasalka gudihiisa iyo in arday kasta lala socdo baahidiisa gaarka ah.

**Ujeeddada** siyaasada macalinka waa in la xoojoyo diyaarinta macalimka, iyadoo loo marayo nidaam maamul oo wanaagsan ee macalimiinta iyo xoojinta tababarida macalimiinta aan shaqadad ku jirin iyo macallimiinta shaqada ku jira oo si joogta ah loo tababaro iyo in la mideeyo shahaadooyinka iyo habka aqoonsiga oo horseedi doona hab-socodka diiwaangelinta macalimiinta iyo bixinta ruqsada macalinimada.

### 1.1 Siyaasada Macalinka Xilliga Xaaladaha deg deg ah iyo Xanuunada Saf-mareenka ah

Wasaaradda waxbarashadu waxay samaynaysaa qorshe ka jawaabaya dhibaatooyinka ka dhaca dalka si aysan u dib dhicin waxbarashada caruurta. Marka xaaladaha deg dega ahi dhacaan sida xauunnada saf-mareenka ah(COVID 19) ama fatahaadaha, abaaraha ama shaqaaqooyinka dalka ka dhaca, waa lama huraan in dadka siyaasadda dejiya ee wasaaradda waxbarashada ee faderaalku ama dawlad goboleedyadu ay ku taliyaan tilaabooyin ka caawinaya macallimiinta inay wax ku bartaan habka fogaan-dersiga(online). Macalimiinta waxaa la tababarayaa iyagoo goobahooda jooga, iyadoo la adeegsanyo mareegta(internet) ama si toos ah, iyadoo la raacayo xeerka ay dejisay wasaaradda caafimaadka si looga in cuduradu ku faafaan macalimiinta, ardayda, dugsiyada ama goobaha kale ee caamka ah. Waa arrin muhiim in dadku ay go'aan ka gaaraan hab waara oo macalimiinta loo tababaro.

### 1.2 Nidaamka Waxbarashada

Nidaamka waxbarashadu waxa uu si cad u sheegayaa in qof kasta oo Soomali ah uu xaq u leeyahay in uu helo waxbarasho, ha ahaato mid dadban ama mid toos ah, sida ku cad dastuurka qabyada ah ee dalka. Nidaamka waxbarashada waa uu muujinyaa in uu jiro dugsi quraan ama xadaano, dugsi hoose/dhexe,

dugsi sare, macaahid iyo waxbarasho jaamacadeed. Sida lagu sheegay siyaasadda waxbarashada dalka, nimaadka waxbarasho waxa uu ku salaysan yahay 4-4-4-4.

### 1.3 Helida Waxabrashada iyo Tayada Waxbarashada

Wasaaradda waxbarashadu waxay balan qaadaysaa inay siyaadiso tirada ardayda waxbarashada aasaasiga ah (Xadaano, dugsiyada hoose/dhexe, waxbarashada aasaasiga ah ee deg deg ah, iyo dugsiyada sare) iyo in la horumariyo tayada waxbarashada, sida lagu qorey qorsha istiraajiyada waxbarashada. Tirada ardayd hadda wax barata (2020 EMIS) waa caruur ka badan nus milyuun oo ay dawlada ka suga waxbarasho iyo macallin oo ku dhaqan qaybaha kala duwan ee dalka.

Tusaale ahaa, fasalada tirade badan, culayska shaqada, gaar ahaan magaalooyinka waaweyn ayaa saamayn toos ah ku leh dhiirigelinta iyo qanaca macalimiinta. Mustaqbalka, dawladu waxa ay qorshasay inay shaqaalaysiiso macallimiin badan si xal loogu helo korarka tirada ardayda ee la filayo. Agabka manhajka sida, buugga ardayga, tilmaame baraha ayaa la siindoonaa dugsiyo badan si loo yareeyo saamiga ardayda iyo buuggaagta u dhexeeya, oo loo hormariyo wax akhriska, qorista, aasaaska xisaabta iyo dhaqan ah in nolosha oo dhan wax la barto.

Si loo gaaro balanqaayadaas, dawladu waxay:

- Uga faa'iideyn doontaa agabka manhaj dugsiyada dawlada iyo kuwa bulshada, waxayna ka shaqayn doontaa in la gaaro saamiga ugu yar ee ka dhaxeeya ardayda iyo buuggaagta, si kor loogu qaado akhriska, qorista iyo aasaaska xisaabta fasalada hoose iyo wixii ka dambeeya.
- Dhisi doontaa fasalo cusub iyo dayactir fasaladii horey u jiray, marka si wanaagsan uu u qiimeeyo injineerka wasaaradda oo ay wasaaraddu ansixiso.
- Xoojinaysaa muhiimada xadaanada iyo dugsiyada quraanka oo macallimiintooda lagu tababari doono xirfadda wax barista iyo dhowrista xaquuqda caruurta.
- Hagaajin doontaa shuruudaha shaqaalysiinta macalimiinta iyo mushahaarka macalimiinta oo saanqaadaya sicir-bararka iyo tirada macalimiinta. Wasaaraddu waxay aqoonsan tahay in tirada macalimiintu ay kordhayso, taasoo macnaheedu yahay in kororka macalimiintu uu saamayn ku yeelan doono qorshaynta agabka, sababtoo ah waxa loo baahan yahay in la shaqaalaysiiyo macalimiin badan iyo dhaqaaale loo baahan yahay.
- Waxay fursad siinaysaa macalimiinta horey tababarka u soo qaadatay in ka qayb galaan barnaamijka joogtaynta horumarinta xirfada macalin si loo siyaadiyo xirfada macalimiinta, loona xoojiyo xirfada barista iyo aqoonta maadada, gaar ahaan dadka mudo dheer ku soo jiray shaqada. Dhinaca kale, macalimiinta aan tababarnayn waxaa la siin doonaa tababar ay casharada qaadan doonaan xilliyada dugsiyadu xiran yihiin, dhammaadka todobaadka ama aqoon-dirsi. Macallimiinta la tababarayo waxay dhisi doonaan aasaaska shaqada barashadooda.

Si loo horumariyo tayada waxbarashada, wasaaradda waxbarashadu waa inay yeelataa nidaamka maamulka macalimiinta oo waxtar leh, kaasoo si fudud u qorshaynaya meelaynta iyo hawl-gelinta macalimiinta. Xogta macalimiinta ee ku jirta nidaamka xog maamulida waxbarashada (EMIS) waxay hubinaysaa tayada tababarada iyo in loo adeegsado go’aan gaarista la xiriirta hawlgelinta, bedelida iyo dalacsiinta macalimiinta. Sidaas darteed, waa lama huraan in xog lagu kalsoonaan karo lagu keydiyo xarunta dhexe ee wasaaradda waxbarashada, taasoo laga adeegsan karo gobolada, kuwaasoo adeegsan kara xogta iyaga ku saabsan, laakiin xarunta dhexe oo kaliya ayaa wada adeegsan karta xogta oo dhan, si go’aan looga gaaro qaybinta agabka, tayo dhowrka iyo tababarada.

## CUTUBKA LABAAD

## DIYAARINTA MACALINKA

Si macalin loogu diyaariyo wax barista fasalka, waxaan tixgelinaynaa muhiimada muqararka tababarka macalimiinta, sharuudaha dadka soo gelaya xirfada macallinimada laga soo bilaabo tababarka shaqada macallinimada ka hor, ama macallinimada ka dib, imtixaanada iyo shahaadooyinka dadka dhamaysta tababarka sida tababarada waxbarashada baahiyaha gaarka ah iyo waxa looga baahan yahay fulinta wax barista xilliga tababarka lagu gudo jiro. Marka uu dhammaado tababarka ama inta lagu jiro tababarka, waxaa lagu talinayaa muhiimada ay leedahay in macalinka la jiheeyo oo la dhiirigeliyo inta uu kala qabsanayo waxbarista ardayda.

Xilliga tababarka macalin dugsiga hoose waa labo sano. Sidoo kale waxaa loo soon gaabin karaa sanad, iyadoo xooga la saarayo xirfada barista iyo samaynta sida ardayda wax loo baro. Macalimiinta dugsiyada sare waxay u baahan yihiin, heerka koowaad ee waxbarashada jaamacadeed oo ay labo maado baranayaan, taasoo leh carbinta macalinimada oo ay kormeerayso jaamacada tababarka bixinaysa.

### 2.1 Muqararka Tababarka Macalinka

Si loo hubiyo in uu macalinku helay xirfada barista iyo aqoonta maadada oo ku filan, waa in wasaaradda waxbarashada ay la tashataa goobaha bixiya tababarka, si ay u diyaariso muqarar faahfaahsan, kaasoo loo adeegsan karo kulliyadaha tababarada macallimiinta ee la aqoonsaday. Wasaaradda waxbarashada ayaa leh go’aanka kama dambaysta ah ee samaynta, ansixinta iyo sugida muqararka tababarka macalimiinta, laakiin waxaa farsamo ahaan fulinaya waaxda horumarinta manaahijta. Si gaar ah waa in loo hubiyaa in muqararku la saanqaadayo qaab-dhismeedka sharciga, siyaasada waxbarashada dalka, dastuurka, qalfoofka manhajka dalka, qorshaha horumarinta dalka iyo qorshaha istiraajiyada waxbarashada. Wasaaradda waxbarashadu waa in ay dadaal ku bixisaa sidii dib loogu eegi lahaa muqararka tababarka macalimiinta seddexdii sano oo kasta mar, iyadoo ay waaxda horumarinta manaahijtu u magacaabayso khuburo dib-u-fiirin ku samaysata muqararka tababarka macalimiinta. Dhinaca kale jaamacaduhu waxa ay tababari karaan macalimiinta haddii ay fulinayaan muqararka ay ansixisay wasaaradda waxbarashada, oo ay jirto fursad ay wasaaradu ku kormeeri karto macalimiinta tababarka ku jirta marka kasta, iyadoo ujeeddadu tahay dhowrista tayayda.

Wasaaradda waxbarashada faderaalka ama dawlada goboleedyada waa inay ansixiyaan xarun kasta oo macallimiinta lagu tababaro, iyadoo la eegayo awoodeeda gudbinta tababarka, madooyinka lagu barto, inay macalimiinta tababari karaan iyagoo habka fogaan-dersiga iyo tiknoolayiyada adeegsanaya. Shahaadooyinka ay bixiyaan xarumaha tababarada macalimiinta ee la ansixiyey waxa aqoonsan doonta wasaaradda waxbarashada ee faderaalka.

Muqararka la ansixiyey waxaa loo adeegsan karaa tababarka macalimiinta shaqada ka hore iyo shaqada ka dib. Muqararka tababarka macalimiintu waa inkuu ka koobnaadaa waxyaabaha soo socda:

- Yoolasha iyo ujeeddooyinka tababarka macalinka
- Dhammaan maadooyinka lagu barto dugsiyada. Tababarka macalimiinta dugsiga hoose waxa uu soconayaa labo sano oo ay ku jiro labo jeer oo carbinta macalinka ah oo ay kormeerayaan macalimiinta wax u dhigta. Tababarka macalimiinta dugsiga sarre waa afar sanno, oo ay ku jiro

labo jeer oo carbinta macalinka ah oo ay kormeerayaan macalimiinta wax u dhigta. Si macalinka dugsiga hoose/dhexe ama sare loo siiyo shahaado waa in ay ku gudbaan imtixaanka carbinta.

- Maadooyinka xirfadu waxa ay ka kooban tahay: Cilmi Nafsiga waxbarashada, Xirfada Barista, falsafada waxbarashada, maamulka iyo hogaaminta dugsiga iyo carbiska macallinka.
- Nidaamka tayo dhowrka- muqararkau waa in uu si cad u sheegaa sida loo qiimaynao maadooyinka la dhigto.
- Muddada tababarku- waxay si cad u sheegaysaa saacadaha waxbarashada, tirada maadooyinka, iwm. Sidoo kale waa in ay si cad u muujisaa dulmarka koorsooyinka/maadooyinka bilowga tababarka.
- Dulmarka koorasada/maadada ee xilli waxbarasho kasta waa in si cad loogu sheego muqararka.
- Kulliyadaha tababara macalimiinta waa inay xoogga saaraan tababarka maadooyinka ay macalimiintoodu yar yihiin sida sayniska iyo luqada.

**2.2 Imtixaanka iyo Shahaadada**.

Waa arrin ka mid ah siyaasada wasaaradda waxbarashada in la xoojiyo tayada waxbarashada iyo ilaalinta caruurta. Sidaas darteed macalimiintu waa inay yihiin kuwo lagu aamini karo inay caruurta wax baraan oo xanaaneeyaan oo qaatay tababar, leh khibrada iyo daacadnimo uu kula dhaqmo caruurta, isagoon dhib u gaysan oo uu wax baro dhib la’aan. Wasaaradda waxbarashadu waa inay hubisaa in macalimiintu ay dhaqan gelinayaan xirfadooda macalinimo si la hubiyey oo ay cadeeyeen goobaha tababarka bixinaya.

1. Marka macalinka tababarka ku jira uu dhammaysto xilligii waxbarashada oo uu ka gudbo imtixaanadii laga rabay oo uu sameeyo carbinta macalinka, xarunta tababarka waxay dejinaysaa imtixaan, kasoo ciddii ka gudubta ay siin doonto shahaado diblooma (diploma) waxbarashada ah ama shahaadada koowaad ee heerka waxbarashada jaamacadeed. Macalinka ku guulaysa hawshaas, waxay wasaaradda waxbarashadu siin doontaa ruqsada macalinnimada.Intaas ka dib waxay waasaaraddaha waxbarashada heer faderal ama heer dawlad goboleed ama maamulka gobalka Banaadir ka hawl-gelin doonaan dugsiyada.
2. Macalinka cusub ee la hawl geliyey waa tusaalayn doona macalin khibrad leh si uu u kobciyo xirfadiisa barista iyo aqoonta maadada.
3. Qofna looma ogola inuu caruurta wax baro, isaga oo aan buuhin sharuudaha 1 iyo 2 ee sare.

Xog faahfaahsan oo ku saabsan macalinmiinta waxa laga heli doonaa nidaamka xogta waxbarashada (EMIS) ee xarunta dhexe ee wasaaradda waxbarashada, si ay u fududaato tixraaca iyo go’aan qaadashada la xiriirta bedelka, tayo-dhowrka iyo dalacaadaha.

***2.3 Tababarka Macalinka***

Dawlada faderaalka ee soomaaliya waxay balan qaaday inay samayso fursado waxbarasho oo ardayda siinaya **qiyamka islaamka, aqoon, akhlaaq iyo xirfad si loo soo saaro dadka leh aqoonta loo baahan yahay ee horumarinta**. Manhajka cusub waa looga dan leeyahay inuu ka dhabeeyo yoolasha waxbarashada. Sidaas darteed, dawladu waxa ay soo saari doontaa walax-qiyaaseed oo dib-uqaabayn loogu sameeyo macalimiinta oo loo hormariyo xirfadooda. Waxaa la tababari doonaa tiro badan oo

macalimiin ah, iyadoo la adeegsanoyo aqoon dirsi, tababar toos ah si loo daboolo baahida loo qabo macalin tababaran. Waxaa xoogga la saari doonaa tiknoolajiyada, maadaama loo baahan yahay in macalimiintu ay adeegsadaan kumbuyuutar. Wasaaradda waxbarashadu waxay isku dayeysaa inay ku dhiirigeliso dadka kartida leh in ay xirfada macalinimada, iyadoo la hubinayo inay buuxiyeen sharuudaha adag ee la dejiyey. Iyadoo ku xiran siyaasada maaliyadeed, dawladu waxa ay dib u eegis ku samaynaysaa mushahaarka la siiyo macalimiinta, si loo soo jiito dadka tababarka sare leh oo ay uga qayb qaataan waxbarashada si loo gaaro riyada ardayda.

Sidoo kale, kulliyadaha tababarka macalimiintu waxay la kulmaan caqabado, mana jiro muqarar shaqeeya ee tababarka macalimiinta oo aan ka ahayn barnaamijka SCOTT PS, kaasoo loo adeegsado tababarka xirfada macalinka. Tababarayaasha oo yar oo aan ku haboonayn in ay tababaraan macalimiinta. Aad ayay u yar yihiin dadka jecel inay ku soo biiraan tababarka macalinimada. Ma jiro hab ku saabsan horumarinta joogtada ah ee xirfada macalinka, taasoo saamaysan niyadooda iyo rajada xirfadooda.

Waxayaabaha aasaasiga ah ee laga rabo macalimiinta mustaqbalka si ay u galaan xuramaha tababarka macalimiinta, waa in ay dhammaystaan waxbarashada dugsiga sare. Sidoo kale, qofka haysta shahaadada heerka koowaad ee jaamacada waxa uu geli karaa xirfada macalinnimada marka uu dhameeyo dibloomo sare ee waxbarasho (Postgraduate diploma in educaiton).

Xarumaha tababarka bixiya waa in laga helaa shuruudaha ay ka mid yihiin: kartidooda ay ku qaban karaan tababar labo sanno ah sida tababarka macalimiinta dugsiyada hoose/dhexe, heerka koowaad ee jaamacada, dhismaha, fasalada, shaybaarada sayniska, garoonka ciyaaraha, iwm. Tababarka macalimiinta dugsiyada hoose/dhexe iyo kuwa sarre waxaa loo tababarayaa siyaabo kala duwan. Tababarka macalimiinta dugsiga hoose/dhexe waa labo sanno, laakiin waxaa loo koobi karaa 18 bilood, iyadoo xoogga la saarayo xirfada barista iyo aqoonta maadada si loo buuxiyo sharuudaha laha rabao macalinka tababaran. Macalimiinta dugsiyada sare, waxaa lagu tababarayaa heerka koowaad ee waxbarashada jaamacadeed, iyadoo baranaya labo maado kala ah mid si buuxda loo baranayo (major) iyo mid si kooban loo baranayo (minor), taasoo qaadanaysa ilaa afar sanno. Xilliga qorista macalimiinta dugsiyada sare loo tababarayo, dadka soo gelaya waxaa loo dooranayaa dululaatiaga ka jira Sayniska (Fiisigis, Kimistari, Bayoloji iyo Xisaabta) ama Fanka (Tarbiyada iyo luqadaha), si loo yareeyo haabida macalimiinta.

### **2.4 Sharuudaha Xulashada Macalimiinta la tababarayo Shaqada ka hor.**

Macalimiinta mustaqbalka waxaa loo tababarayaa labo hab oo kala ah: tababarka macalimiinta shaqada ka hore iyo macalimiinta shaqada ka dib. Tababarka macalimiinta ee shaqada ka hore waa hab qofka macalinka loo tababarayo uu si toos ah u dhigto kulliyada tababarka macalinka ay aqoonsan tahay wasaaradda waxbarashada ee faderaalka oo uu dhammaysto dhammaan koorsooyinka/maadooyinka lama huraanka ah oo ay ka mid tahay tababarka carbinta macalinka si loo siiyo shahaado marka uu ku gudbo imtixaanada, ka dibna laga diiwaan geliyo xafiiska wasaaradda waxbarashada ee ku shaqo leh. Tababarka macalimiinta shaqaysa waxa gala macalimiinta aan tababarnayn ee ka shaqeeya, kasoo la qabto xilliyada dugsiyadu xiran yihiin, ama si aqoon dirsi ah oo ay dhammaystirtaan koosooyinka/maadooyinka lama huraanka ah. Ugu dambayntii macalinka waxaa la gudoonsiiyaa shahaado dibloomo ah ama dibloomo sare ee waxbarashada ku saabsan, ka dibna waxaa loo diiwaan geliyaa macalin tababaran. Fursadaha tababarku waxa ay leeyihiin shuruudo.

### 2.4.1 Sharuudaha Tababarka Macalimiinta ee Shaqada ka hor ee Dugsiyada Hoose/Dhexe

Macallimiinta la tababarayo shaqada ka hore si ay u helaan shahaadada xirfada macalinka waxaa looga baahan yahay shuruudaha soo socda:

1. Waa inuu dhammaystirtay waxbarashada dugsiga sare oo ku gudbay ugy yaraan 70% ama ka sareeya.
2. Waa in uusan ka yaran 18 sanno, kana weyneyn 50 sanno.
3. Waa inuu haysto shahaadada anshax wanaaga
4. Waa inay ka gudbaan imtixaan qabuulka ee ay dejisay wasaaradda waxbarashada si loo tijaabiyo sida ay u baran karaan xirfada macalinnimada.

### 2.4.2 Sharuudaha Tababarka Macalimiinta Shaqada ku Jirta ee Dugsiga Hoose

Tani waa kooso horumarinta xirfada macalinnimada oo ku saabsan xirfada barista, aqoonta maaddada iyo wargelinta aqoonta cusub iyo hal-abuurka waxbarashada. Tababarkan waxaa loo adeegsan karaa in lagu tababaro macalimiinta aan horey u helin fursad tababar macalinnimo iyo macalimiinta aan tababar kobcinta aqoonta ah helin, kuwaasoo ka shaqeeya dugsiyada oo u baahan inay bartaan arrimaha casriga ah ee waxbarashada sida tiknoolajiyada xogta, ama doodaha ku saabsan waxbarashada ee la xiriira waxbarashada reer guuraaga, qaxootiga, iyo dadka dalka ku soo noqday, iwm.

Wasaaradda waxabarshadu waxay og tahay in tiro badan oo macalimiin ah oo aan tababarnayn ay dugsiyada ka hawl galaan, sidaas darteed waxaa si deg deg loo adeegsanyaa tababarka macalimiinta shaqada ku jirta si kor loogu qaado xirfadooda. Waxyaaba aasaasiga ah ee looga baahan yahay ka qayb galka tababarka macalimiinta ee shaqada ka dib waa in ka qayb-galuhu uu balan qaado inuu dhammaystirto koorasada. Waxaa la adeegsan karaa mareegta (internet-ka) ama fasal toos ama aqoon-dirsi. Adeegsiga mareegta (internet-ka) ee wax baristu waxa ay caadi noqday markii uu dilaacay cudurka COVID 19 ee dunida halaagay dabayaaqadii sannadkii 2019.

### 2.5 Sharuudaha Xulashada ee Tababarka Macalimiinta ee Dugsiga Sare

Sida caadiga ah macalimiinta dugsiga sare waxaa lagu tababaraa habka tababarka macalimiinta ee shaqada ka hor, laakiin waa suuro gal in la adeegsado habka tababarka macalimiinta shaqada ku jira, iyadoo wax lagu baranayo habka aqoon-dirsadka ama internet-ka wax laga barto. Xarumaha tababarka macalimiinta waxay kula talinayaan wasaaradda waxbarashada inay bilowdo tababarka macalimiinta shaqada ku jirta ee dugsiyada sare oo waxtar leh, kaasoo ku salaysan go'aan xaqiiqda ku dhisan oo fursad u siinaya macalimiinta in lagu tababaro xarumaha tababarka macalimiinta ee jira.
Macalimiinta loo tababaryo dugsiyada sare waxa looga baahan yahay inay dhibco fiican ka haystaan maadooyinka ay jaamacada ku dhiganayaan si ay u helaan shahaadada heerka koowaad ee jaamacada oo ay u noqdaan macalin tababaran oo awood u leh maadooyinka dugsiyada sare iyo xirfada wax barista. Ugu yaraan waa inay yeeshaan awood ay ku dhigi karaan labo maado marka ay qalin jebiyaan. Sharuudaha waxaa ka mid ah:

i) Macalinmiinta dugsiga sare loo tababarayo waa inay dhigtaan afar sanno oo heerka koowaad ee waxbarashada jaamacadaha maadooyinka ay ku takhasusayaan. Marka ay dhammeeyaan waxbarashada waxaa la siinayaa shahaadada heerka koowaad ee waxbarsahda jaamacadaha.

ii) Dadka kale ee ka qalin jabiyey oo doonaya inuu macalin noqdo, waxa uu qaadan karaa dibloomo sare oo ku saabsan waxbarashada, kaasoo soconaya muddo hal sanno ah oo uu dhigo labo maado maadooyinka manhajka, iyo inay sameeyaan labo carbin muddo hal bil ah.

iii) Waa in uusan ka yaran 18 sanno, kana weyneyn 50 sanno.

**2.6 Waxbarashada loo Wada Dhan yahay ee Tababarka Macalimiinta.**

Si loo baahiyo in ay caruurta Soomaaliyeed oo dhan ay helaan waxbarasho, manhajka qaranku waxa uu xoojin doonaa tayada waxbarasho loo wada siman yahay oo ka jirta wadanka oo dhan. Ma jiri doono dugsi gaar ah u ah caruurta baahiyaha gaarka ah leh, maadaama ay arrintaasi tahay kala sooc. Sidaas darteed wasaaradda waxbarashadu waxay hubinaysaa in muqararka tababarka macalimiinta ay ku jirto qayb ku saabsan waxbarashada gaarka ah, kaasoo macalimiinta awood u siinaya inay si waxtar leh ugu dhigaan oo ay u fahmaan baahida gaar ah oo kala duwan ee ardayda baahiyaha gaarka ah leh, marka ay dhammaystaan tababarka macalimiinta. Wasaaraddu waxa ay hubinaysaa in xarumaha tababarka macalimiinta lagu daray waxbarashada gaarka ah ama cutub ka mid ah muqararka oo ku saabsan waxbarashada gaarka ah oo loo dhigayo dhammaan macalimiiinta si ay u helaan xirfada iyo aqoon lagama maarmaan u ah inay si waxtar leh wax u baraan oo u fahmaan caruurta baahiyaha gaarka ah leh.

Wasaaradda waxbarashada waxay balan qaaday inay tababarto oo shaqaalaysiiso macalimiinta waxbarashada gaarka ah iyo in la samaynayo hab lagu tababarayo kaadirada ku tababari doona macalimiinta waxbarashada gaarka ah oo heer qaran ah.

Shuruudaha xulashada tababartayaasha waxbarashada gaarka ah waxay la mid yihiin shuruudaha macalimiinta kale. Macalimiinta waxbarashada gaarka ah laguma tababarayo xarumo gaar ah, maadaama arrintaas loo arko takoor.

.

## CUTUBKA SADDEXAAD

**Dhinacyada Maamulka Siyaasada Waxbarashada**

Siyaasadaha hoose ku qoran sida: diiwaangelinta, shaqaalaysiinta, anshax-marinta, jaangoynta mushahaarka macalimiinta waxaa loogu talo galay in ay sugaan raadraacida macalimiinta dalka si loo horumariyo xirfadooda oo caruurta looga ilaaliyo xadgudub, six un wax u baris, taasoo ay suurogal tahay inay si xun u saamayso natiijada waxbarashada ardayda iyo waxa u xasilaya dhammaan ardayda dalka, gaar ahaan waxbarashada aasaasiga ah. Siyaasadu sidoo kale waxay ay bixinaysa talooyin ku saabsan sida ugu wanaagsan ee macalimiinta lagu diiwaangelin karo, lagu shaqaalaysiin karo iyo habraaca lagu hawlgelin karo macalimiinta.

Dawladu waxay soo jiidanaysa in dhalinyarada xirfada leh ay galaan xirfada waxbarista. Sidoo kale waxay dad badan ku dhiirigelinaysaa inay waxbarashada heerka jaamacadeed u bartaan koorsooyin la xiriira macalinnimada oo ay siiso mushahaar wanaagsan dadka dhibco sare ka gaara waxbarashada. Sidaas darteed, dawladu waxay mushahaarda ku salaynaysaa heer waxbarashada, tababarka iyo khibrada macalimiinta ee wax barista.

### 3.1 Siyaasada Diiwaangelinta

Siyaasadan waxaa ka mid ah diiwaangelinta macalimiinta si loo xoojiyo oo loo nidaamiyo heerka barista ee dalka.

Ujeeddada guud ee siyaasadani waa in halbeeyada xirfadaha lagu beero xirfada wax barista iyo in kalsooni lagu beero waalidka, taasoo la xiriirta in macalimiin xirfad leh ay caruurtooda dugsiyda ku hayaan. Sidoo kale, waa in la hubiyaa in macalimiintu leeyihiin aqoon saxan, karti iyo akhlaaq wanaagsan. Waaxda Horumarinta Adeega Waxbarashada ee wasaaradda waxbarashada ee faderaalka ayaa diiwaangelinaysa macalimiinta dusgiyada hoose/dhexe iyo kuwa dugsiyda sare oo dhan, marka ay dhammaystaan koorasada oo ay ku jirto carbinta macalinka. Macalimiinta oo dhan waxaa looga baahan yahay inay iska diiwaangeliyaan xafiiska ay khuseeya, marka ay helaan shahaado macalinnimo. Macalimiinta wax barista ku jira waxaa la siinayaa waqti ay isaga diiwaangeliyaan waaxda. Cidii aan is diiwaangelin looma ogolaanayo in ay wax ka dhigaan goobaha waxbarashada. Saraakiisha tayo-dhowrka ee goob kasta waxaa laga filayaa inay ka soo warbixiyaan macalin kasta oo aan diiwaan gashanayn oo shaqeynaya si looga qaado tillaabo ku haboon cida kasta oo jebisa siyaasadan.

*Diiwaangelinta macalimiinta waxaa ka mid ah hubinta shahaadooyinka iyo xirfada macalimiinta iyo sooyaalkooda, iyadoo ku salaysan shuruuda ah "Yaa macalin noqon kara? Run ahaantii, waa in dadka doonaya in ay noqdaan macalin ay yihiin kuwo daacad ah oo aan dalka dembi ka gelin, oo maskax ahaan wanaagsan, oo leh xirfad iyo aqoon wanaagsan. Dadka leh xirfada macalinnimo waa inay iska diiwaangeliyaan waaxda horumarinta macalimiinta ka hor inta aysan bilaabin shaqada macallinnimada goob kasta oo wax lagu baranayo. Galalka macalimiinta waxaa lagu keydinayaa xafiisyada ku shaqada leh ee wasaaradaha waxbarashada ee heer faderaal iyo dawlad goboleedyo. Sidoo kale,* Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah waxa uu samayn doonaa diiwaan-gelinta macalimiinta, iaydoo ku xiran wasaaradda maaliyada, iyadoo la ilaalinayo xuquuqda iyo xeerarka sharuudaha.

Waaxda horumarinta macalimiinta, iyadoo la tashi la samaynaysa waaxda maaliyada iyo waaxda shaqaalaha, waxaa loo xilsaaray inay shaqaalaysiiso, oo hawlgeliso, oo bedesho, oo dhowrto hab-dhaqanka macalinka oo ay joogtaysiiso heerarka xirfadaha ee macalimiinta oo dhan eek a shaqeeya dugsiyda dawlada iyo kuwa bulshada, iyadoo si waxtar leh oo hubinayo tayda. Dugsiyada gaarka ah waxaa laga rabaa inay shaqaalaystaan ooh hawl-geliyaan macalimiinta diiwaan-gashan oo kaliya. Waaxda horumarinta macalimiintu waxa ay samayn doontaa wixii isku shaandhayn ah oo loo baahdo, ka hor inta aan la diiwaan gelin macalimiinta, iyadoo ka wakiil ah wasaaradda waxbarashada.

### 3.1.1 Sababayn

Waxaa jira tiro badan oo macalimiin ah oo ka shaqaysa dugsiyada gaarka ah, kuwa bulshada iyo dugsiyda caamka ah, kuwaasoo aan la diiwaan gelin. Diiwaangelinta macalimiintu waxay lagama maarmaan u tahay nidaamka maamulka xogta macalimiinta(TMIS) oo xoojinaya nidaamka maamulka xogta waxbarashada(EMIS) ee xarunta dhexe, sidaas darteed, waaxdu waxay raadraac ku samayn kartaa soo saarida macalimiinta iyo baahida loo qabo macalimiinta dugsiyada caamka ah iyo kuwa bulshada. Wasaaraddaha waxbarashada ee dawlad goboleedyadu waxa ay adeegsan karaan nidaamka maamulida xogta waxbarashada(EMIS) ee macalimiinta ee ay awooda u leeyihiin. Ururada dugsiyada gaarka ah waxaa looga baahan yahay inay diiwaan geliyaan macalimiintooda, sidaas darteed waxaa dugsiyada ka shaqayn kara macalimiinta diiwaan gashan oo kaliya, si loo ilaaliyo xaquuqda waalidka ee bixinaya lacagta ardayda. Guud ahaan, ujeeddada ugu weyn waa in xirfad iyo akhlaaq lagu beero xirfada wax barista.

### 3.1.2 Ujeeddooyinka Siyaasada

Ujeeddooyinka siyaasada waxaa ka mid ah:

1. In la hubiyo in dhammaan macalimiintu ay rajaynayaa inay iska diiwaan geliyaan waaxda horumarinta macalimiinta ee wasaaradda waxbarashada.
2. In la xifdiyo xirfada iyo tayada heerarka ee xirfada wax barista, si loo hubiyo in macalimiinta tababaran  oo kaliya loo diiwaangeliyey macalin ahaan.
3. In waasaradda waxbarashada ay awoodo qorshaynta waxyaabaha layska rabo ee xirfada macalimiinta sida tababarka, dalacaada, horumarinta joogtada ah ee xirfada macalinnimada.
4. In la hubiyo in nidaamka maamulida xogta macalimiinta (TMIS) la sameeyey, iyadoo laga shaqaynayo xoojinta nidaamka maamulka xogta waxbarashada ee wasaaradda waxbarashda.

### 3.1.3 Baaxadda iyo Tusaalaynta

Siyaasadani waxa ay khusaysaa dhammaan macalimiinta dugsiyada hoose/dhexe, kuwa sare iyo waxbarashada aasaasiga ah ee degdega ah. Sidaas darteed, siyaasadani ma khusayso macalimiinta xadaanada ama dugsiyda quraanka, in kasta oo macalimiina dugsiyada isku-dhafan laga rabo in ay iska diiwaan geliyaan wasaaradda waxbarashada. Macalimiinta xadaanada waxaa suurogal ah inay is diiwaan geliyaan, haddii uu ku taliyo agaasiamaha guud ee wasaaradda waxbarashada.

Siyaasadani waxa ay leedahay talo-bixinta soo socota:

i. Diiwaangelinta macalimiintu waa shaqo joogto ah ee wasaaradda waxbarashada.
ii. Diiwaangelinta macalimiinta waa mid u furan macalin kasta oo tababaran iyo macalimiinta cusub ee dhowaan la tababaray oo doonaya inay kor u qaadaan xirfadooda wax barista.

iii. Hubinta in macalinku u baahan yahay ruqsada shaqada inta aan la shaqaalaysiin.
iv. Macalinka aan tababarnayn waxa uu u baahan yahay in la diiwaangeliyo, maadaama loo baahan yahay adeegooda wax barista tirada macalimiinta oo yar, iyadoo uu tusaalaynayo macalin khibrad leh ama maamulaha. Waxaa la siin doonaa waqti ay dhammaystaan tababarka macalinka shaqada ku jira, oo si buuxda loo diiwaan geliyo.

Kaalinta waaxda horumarinta macalimiinta ee wasaarada waxbarashada ee faderaalka waa inay qabato codsiyda diiwaangelinta ee macalimiinta raba inay mustaqbalka shaqeeyaan oo ay siiso shahaadada diiwaangelinta, marka si taxadar leh loo hubiyo shahaadooyinkooda. Macallinka la diiwaan geliyey oo kaliya ayaa la siinayaa tirsi, kaasoo ah aqoonsi gaar ah ee xogta macalinka ee lagu kaydiyey waaxda. Dadka macallimiinta noqon doona waxa ay codsan doonaan diiwaangelinta, iyagoo buuxinaya foomka laga helayo waaxda horumarinta macalimiinta, xarunta dhexe ama xarumaha dawlada goboleedyada. Waxaa la samayn doonaa hab lagu hubiyo in foomamka is diiwaan gelinta laga helayo xafiisyada waxabarashada ee gobolada, sidaas darteed qofna uma safrayo xarunta dhexe ee wasaaradda si uu u helo foom, gaar ahaan kuwa ka shaqeeya dawlad goboleedyada. Foomamka la buuxiyey waxa loo dhibaa wasaarada ama e-mail baa loogu diraa.

Foomka waa in uu la socdaa nuqulka shahaadada, sooyaalka, kaasoo ka dhigaya codsadaha macallin xirfad leh. Shahaado bixintu waxaa samaynaya wasaaraddaha waxbarashada ee dawlad-goboleedyada, xafiisyada waxbarashada guddoomiyaasha gobolada oo ogaan kara shahaada, iyagoo u soo diraya waaxda horumarinta ee wasaaradda waxbarashada ee heer faderaal ama heer dawlad goboleed.

Waxyaabaha looga baahan yahay in aad macalin noqoto waa in aad tahay muwaadin Soomaali ah, oo haysta shahaadadii loo baahnaa ee macalinnimada, oo caafimaad qaba, oo bulshada ku dhexdeed leh sumcad wanaagsan. Dadka kale ee haysata shahaado macalinnimo waa la diiwaangelinayaa, iyada oo si taxadar leh loo hubinayo shahaadooyinkooda oo la tixraacayo goobihii ay ka soo shaqeeyeen.

**3.2 Siyaasada Shaqaalaysiinta**

Dawladu waxay ogtahay baahida loo qabo macalin tababaran sida ay muujinayaan natiijadii cilmi barista imitixaanka kartida macalinka ee la sameeyey sannadkii 2019 iyo natiijaddii imtixaanka fasalka afraad ee dugsiga sare ee sannadka 2018/2019. Waxaa lagu haminayaa in la helo macalimiin tababaran oo ku filan heerkasta oo waxbarashada ka mid ah, si loo hubiyo in meel kasta magaalo iyo miyi loogu adeegayo si siman. Macalimiin rag iyo dumar ah oo tababaran ayaa la shaqalaysiin doonaa, iyada oo uusan jirin kala sooc nooc kasta oo uu yahay. Tirada macalimiinta dumarka ah ee hadda shaqaysa waa ay yar yihiin, waxaana dumarka lagu dhiirigelin doonaa inay soo codsadaan shaqada macalinnimada.

Waalidiintu waxa ay xaq u leeyihiin inay dalbadaan in macalin tababaran uu caruurtooda wax ugu dhigo si loo xoojiyo natiijada waxbarashadooda. Sidaas darteed waa arrin muhiin ah in la shaqalaysiiyo macalimiin wanaagsan is loo daboolo baahida loo qabo macalin tababaran. Si looga dhabeeyo riyadaas, dawladu waxay si dhaqso ah u tababari doontaa macalimiin, iyadoo la adeegsanayo habka wax ku barista mareegta(internerka) ama raadiyahay, ama teleefisinka, iwm. Waxaa xusid mudaan in shaqalaysiinta macalimiintu ay keentay baahi loo qabo oo ay wasaaradda waxbarashadu ay ku salayn doono in la shaqaalaysiiyo macalin tababaran. Sidoo kale, mustaqbalka, wasaaradda waxbarashadu waxay ku baahin doontaa dawlada goboleedyada maamulida hawlaha macalimiinta, marka la helo habraac saxan oo ay

awoodaan inay cagahooda ku istaagan oo ay hawshooda gudan karaan. Wasaarada waxbarashada waxay samayn doontaa saadaalin ku saabsan macalimiinta loo baahan yahay in la shaqaalaysiiyo mustaqbala, si loo horumariyo qorshaynta iyo qaybinta.

*Meelaha ay macalimiintu ku yar yihiin sida tuulooyinka, iyo xeebaha, dawladu waxay ogolaanaysaa in ardayda wax lagu baro habka fasalada wadajira, kaasoo ah in hal macalin uu wax u dhigo arday heerkoodu kala duwan yahay oo hal fasal wax ku wada barta. Tani waxa ay caawinaysaa meelaha macalimiintu ku yar tahay. Waxaana macalimiinta la siinayaa tababar ku saabsan sida wax loo baro arday hal fasal wax ku wada barata oo heerkoodu kala duwan yahay.*

Macalimiinta dugsiyada hoose/dhexe waxaa la shaqaalaysiin karaa marka ay haystaan diblooma macalinimo oo ay bixisay xarun la aqoonsan yahay, ka dibna wareysi laga qaado oo ay guddiga wareysigu ku qancaan. Sidoo kale macalimiinta dugsiyada sare waxaa la shaqaalaysiinayaa shahaadadooda iyo maadada ay si buuxda u barteen iyo mida ay si kooban u barteen. Ma jiro haybsoocid ku salaysan jinsiga, gobol ama naafonimo. Labada heerba, shaqaalaysiinta macalimiinta dumarka ah waxaa la siinayaa tixgelin gaar ah si ay u xanaaneeyaan oo u tusaaleeyaan caruurta dhigata fasalada hoose. Haddii ay tiro yar oo gabdho ah ay shaqo soo codsadaan, waxaa dhammaantood lagu darayaa dadka imitixaanka laga qaadayo.

### 3.2.1 Baaxadda Siyaasada

Baaxadda siyaasadaan waxay khusaysaa shaqaalaysiinta macalimiinta dugsiyada hoose/dhexe iyo kuwa sare. Siyaasadani waxa ay ku soo jiidanaysaa macalimiinta dugsiyada sare inay ka mushahaar badan yihiin macalimiinta dugsiyada hoose. Macalimiinta dhiga luqadaha, tarbiyada islaanka, sayniska(Bayology, Kimistari, Fiisigis, Xisaab) waxaa la siin doonaa tixgelin gaar marka la shaqaalaysiinayo, maadaama ay jiro baahi loo qabo macalimiintas iyo maadooyinka kale ee ay ka jirto macalimiin yaraan.

### 3.2.2. Aasaaska Siyaasada

Aasaaska siyaasadan wuxuu salka ku haysaa cadaalad, aqoon, sinaan iyo ka jawaabida baahiyaha kala duwan eeardayda. Wasaaradda waxbarashadu waxa ay ku dhiirigelinaysaa gabdhaha macalimiinta ah inay codsadaan shaqada macalinnimo, iyagoo ka helaya tixgelin gaar ah dugsiyada ay ku yar yihiin macalimiinta dumarka ah. Looma dulqaadanyo hayb-sooc ku salaysan gobol, jinsi, qabiil ama naafonimo. Qof kasta oo dareema in la hayb-soocay waxa uu xaq u leeyahay inuu cabasho u gudbiyo agaasimaha waaxda horumarinta adeegsa bulshada, si uu dib u eegis ugu sameeyaan sidii shaqaalaysiintu u dhacday. Si looga hor tago tiro yarida macalimiinta dumarka, wasaaraddu waxa ay hisregilanysaa xarun tababar macalimiinta gabdhaha ah oo sannad kasta lagu tababaro 150 macalimiin gabdho ah. Waxaa la rajaynayaa in ay kordhiso tirada gabadhaha macalimiinta ah.

Mas'uuliyada fulinta hawshaan waxaa iska leh qaybta horumarinta macalimiinta, waaxda shaqaalaha iyo agaasimaha guud ee wasaarada waxbarashada ee faderaalka.

## 3.3. Hawl-socodka Shaqalaysiinta

Shaqaalaysiinta macalimiinta waxa laga eegayaa meelaha muhiimada la siiyey sida ku cad qorshaha istiraajiyada waxbarashada. Istiraajiyada shaqaalaysiintu waxay ay tixgelinaysaa baahida tiro ahaan u jirta sida, baaxada fasalka, tirada ardayda, goobaha dugsiyadu ku yaaliin, takhasuska maadada, tirada macalimiinta shahaado macalinnimo haysta, iyo kartida macalimiinta. Xaalada dalku, istiraajiyada

shaqaalaysiintu waxa ay tixgelinaysaa tiro yarida ardayda dugsiyada dhigata, taasoo macnaheedu yahay inay ay yar tahay ka qaybgalka waxbarashada aasaasiga ah iyo tan dugsiyada sare.

Figrada ahaan, shaqaalaysiintu waa inay ka dhacdaa meesha ay ka jirto baahida macalain tababaran iyo helitaanka dhaqaalihii lagu shaqaalaysiin lahaa macalin cusub. Waaxda horumarinta macalimiinta oo kaashanysa waaxda maaliyada iyo waaxda shaqaalaha waa in ay hubiyaan cadaalada iyo hufnaanta hawl-socodka shaqaalaysiinta oo ay kormeeraayo agaasimaha wasaaradda waxbarashada ee faderaalka.

Waxaa jiri doona guddiga shaqaalaysiinta macalimiinta. Guddiga shaqaalaysiinta macalimiintu waa inay noqdaan kuwo cadaalad iyo hufnaasba leh. Habsocodka shaqaalaysiintu waxa uu ka kooban yahay, xayeysiinta, xulashada dadka imtixaanka laga qaadayo, doorashada qofka guulaystay, dugsi ku meelaynta iyo hawlgelinta tartamaha guulaystay. Wasaaradda waxbarashadu waxay fududayn doontaa magacaabista todobo qof oo ah guddiga shaqaalaysiinta macalimiinta oo laga soo xulayo waaxda maaliyada, waaxda shaqaalaha iyo waaxda horumarinta adeega waxbarashada si ay u shaqaalaysiiyaan macalimiinta oo ay sameeyaan dadaal taxadar leh marka oo ay socodto hawsha shaqaalaysiinta.

Guddiga waxaa laga doonayaa inuu kaydiyo xayeysiisyada, xulashada tartamayaasha la imtixaanayo, heerka dhibcaha wareysiga iyo ka hawlgelinta dugsiyada. Waxaa la tixgelinayaa dadka codsiyadooda u soo diray qaybta horumarinta macalimiinta oo kaliya. Inta ay socoto hawsha shaqaalaysiinta, warbixinta shaqaalaysiinta waa la kaydiyaa si mustaqbalka ay u noqoto tixraac, haddii uu soo cowdo tartame dhibsaday go’aanka guddiga ama natiijyada shaqaalaysiinta.

**3.3.1 Tilmaamaha xukumaya habsocodka shaqaalaysiinta ee lagu sharxay jaantuska 1 sida hoos ku qoran:**

i) Wasaaradda waxbarashada waxaa lagu wargelinayaa baahida loo qabo in la shaqaalaysiiyo macalimiin, taasoo ku salaysan cilmi baaris sida Nidaamka maamulida xogta waxbarashada(EMIS) oo cadaynaysa baahida jirta ee ku saabsan macalimiinta tababaran.

ii) Wasaaradda waxbarashadu waxa ay aqoonsanaysaa meelaha ay ka jirto macalimiin yaraantu si loo yareeyo dhibaatada macalin yaraanta. Waxyaabaha arrintaas tilmaamaya waxaa ka mid aha: saamiga macalinka iyo ardayda ama yaraanta macalimiinta wax dhigta, taasoo laga qaadan doono go’aan ku saabsan in macalimiinta laga hawlgeliyo dugsiyada. Arrintaas waa marag u ah nidaamka maamulka xogta waxbarashada(EMIS).

***iii)*** *Shaqooyinka bannaan waxa lagu soo xayeysiinayaa warbaahinta ay wasaaraddu aqoonsan tahay sida raadiyayaasha, website-yada ama meelaha lagu dhejiyo ogeysiisyada wasaaradda ee gobolada iyo degmooyinka.*

iv) Tartamaha waxa lagu xulanaya shahaadada, khibrada iyo inuu ka diiwaan gashan yahay waaxda horumarinta macalimiinta.

v) Tartamayaasha imtixaanka laga qaadayo waxaa lagu soo xulanayaa qodobada sare.

vi) Guddiga shaqaalaysiinta ee wasaaradda ayaa qaadaya wareysiyada si ay u xushaan tirada macalimiinta loo baahan yahay, iyadoo ku salaysan sharuudaha tixraaca qeexida shaqada.

vii) Tartamaha guulaysta waxaa la siin doonaa warqada magacaabista oo ay qortay waaxda horumarinta macalimiinta oo uu ku saxiixan yahay agaasimaha guud.

viii) Tartamaha guulaysta waxaa laga hawlgelin doonaa dugsiyada ay ka jirto baahida macalinnimo sida ku cada faqrada (ii) ee sarey lagu soo sheegay.

**3.4. Dukumiintiyada:**


Waa arrin muhiim ah in qaybta horumarinta macalimiinta ay kaydiso dukumiintiyada la xiriira shaqada marka ay socoto hawsha shaqaalaysiinta. Agabka loo baahan yahay si loo fuliyo siyaasada shaqaalaysiintu waxaa ka mid ah:

- Tilmaamaha shaqaalaysiinta
- Magacyada tartamayaasha
- Codsiyada
- Nuqul ka mid ah shahaadooyinka iyo sooyaalka tartamaha
- Foorm dhibcaha ee tartamaha
- Warbixinta wareysiga
- Warqada caafimaadka ee uu bixiyey isbataal la aqoonsan yahay.

Dukumiintayda sarey lagu soo sheegay waxay lagama maarmaan u yihiin fulinta siyaasada shaqaalaysiinta, kuwaasoo loo baahan yahay in laga helo madaxa xafiiska horumarinta macalimiinta.

Waxaa laga codsan karaa in e-mail aad ku dirto cinwaanka laga helo wasaaradda qofkasta oo doonaya inuu codsado shaqo macalinnimo oo heer dugsi hoose/dhexe ama dugsi sare. Ka dibna waa in dadka shaqada soo codsaday ay buuxiyaan foomaka khuseeya oo ay dib ugu diraan qeebta horumarinta macalimiinta, iyadoo foomamka lagu muujinaya tixraacyada codsadaha.

**Jaantuska 1: Shaxda Hab-socodka Shaqaalaysiinta**



### 3.5. Istiraajiyada Shaqalaysiinta

- Wasaaraddu waxay hubinaysaa in shaqaalaysiinta macalimiintu ay ka timi warbixinta laga soo diray gobollada/degmooyinka dalka.
- Wasaaraddu waxay xayeysiinaysaa jagooyinka macalinimo ee loo baahan yahay.
- Waxaa la daabacayaa magacyada tartamayaasha oo waa la imtixaani doonaa.
- Tartamaha guulaysta waa la sheegi doonaa magaciisa, waxaana loo diri doonaa warqada magacaabista.
- Macalinka la magacaabay waxaa laga hawlgelin doonaa dugsiyada.

### 3.6. Hawlgelinta Macalimiinta

Macalinka la magacaabay waxaa laga hawlgelin doonaa goobaha ay ka jirto baahida macalinimo. Waxaa la tixgelin doonaa saamiga macalinka iyo ardayda, maadooyinka macallimiintoodu yar tahay, marka ay dhammaato hawsha shaqaalaysiinta. Haddii aysan jirin xaalada amni daro, macalinku waxa uu ka shaqayn karaa meel kasta oo looga baahan yahay. Marka macalinka laga hawlgeliyo dugsi, waaxda horumarinta macalimiintu waxa ay la xiriiraysaa waaxda maaliyada iyo waaxda shaqaalaha, si loo hubiyo in macalinka cusub lagu daray nidaamka mushahaar bixinta oo uu aysan shaqada dugsiga wax u dhimin qanac la'aan ka dhalatay mushahaar la'aan. Waxaa maamulaha laga filayaa inuu ka warbixiyo marka uu soo gaaro macalinka cusub iyo xaalad kasta oo maqnaansho ama xanuun ah, isagoo warbixinta u gudbinaya wasaaradda waxbarashada, iyadoo la adeegsanayo dukumiintiga ugu muhiimsan.

### 3.7. Siyaasada Mushahaarka Macalimiinta

Sababta ay shaqaalulu ugu nagaadaan shaqadada waa dhaqaalaha ku soo gala mushahaar ahaan oo ay ku nool yihiin. Sidaas darteed, waxaa loo baahan yahay in la helo mushahaar go'an ee macalimiinta ka shaqeeya dugsiyada caamka ah ee hoose/dhexe iyo kuwa sare. Heerka mushahaarku waxaa hagaya heerka aqoonta iyo khibrada macalinka. Dhab ahaantii, sharuudahani waxaa inay ku dhiirigeliyaan macalimiinta in ay mustaqbalka ku jiraan tababar iyo waxbarasho.

Qofku waxa uu ku noqon karaa macalin tababaran oo dugsi hoose/dhexe, marka uu dhammaysto dugsi sare oo galo labo sanno oo tababar macalinnimo ah si loo siiyo shahaado ah diblooma macalinnimo. Hase yeeshee macalimiinta dugsiyada sare waa inay haystaa shahaadada heerka koowaad ee jaamacadeed oo ku saabsan waxbarashada.

Ugu horeyntii, ardayda ka soo qalin jebisay jaamacadaha waa inay bartaan heerka koowaad ee waxbarashada jaamacaha oo la gudoonsiiyey shahaadada koowaad ee heerka jaamacada (Fanka(arts), Sayniska ama takhakhus kale). Ardayda qalin jabisa ee aan horey u soo qaadan tababarka macalimiinta waxa loo tixgelinayaa inay macalinnimo ku shaqeeyaan, laakin waxaa loo aqoonsan yahay in ay yihiin macalimiin aan tababarnayn, taasoo loola jeedo in ay ka mushahaar hooseeyaan macalimiinta tababaran. Si ay ugu jiraan shaqada macalinimada, macalimiinta aan tababarnayn oo shaqaynayey muddo labo sanno ama ka badan waxaa loo tixgelinayaa in lagu tababaro habka macalimiinta shaqada ku jira ee horumarinta xirfada macalinka. Macalimiinta aan doonayn inay ka qayb qaataan tababarka macallinimo, waxaa si tartiib ah looga saarayaa shaqada macalinnimada, iyadoo lagu badelayo macalimiin tababaran si kor loogu qaado tayada waxbarashada ee dugsiyada iyo si ay kor ugu kacdo hiigsashada ardayda.

Sidaas darteed, waa arrin iska cad in loo baahan yahay inay jirto kala duwanaansho ku saabsan heerka waxbarashada macalimiinta dugsiyada hoose/dhexe iyo kuwa sare. Macalimiinta dugsiyada sare waxa ay yeelan karaan aqoon heer jamacadeed oo aan macalinnimo ahayn. Macalimiinta tababaran ee dugsiga sare waxay barteen labo maado(major/minor), kuwaasoo ah macallimiin tababaran oo la door bidayo inay dugsiyada sare wax ka dhigaan.

### 3.8. Heerarka Mushahaarka

Marka la tixgeliyo shahaadada heerka macalinka dugsiyada hoose/dhexe iyo macalinka dugsiga sare, waxaa loo baahan yahay in ay jiraan labo heer oo mushahaar oo kala duwan. Sidaas darteed waxaa jira saddex darajo oo ku saabsan mushahaarada macalimiinta si loo horumariyo tayada barista iyo barashada ardayda. Kuwaasi waxa ay ku salaysan yihiin shahaadooyinka macalinka iyo tababarka macalinka(diblooma, shahaado jamacadeed).

### 3.9. Siyaasada Hagaysa Mushahaarka Macalimiinta

Heerka soo socda ayaa la fulinayaa marka mushahaarka loo qoondaynayo macalimiinta ka shaqaysa dugsiyada caamka ah, kuwa gaarka ah iyo kuwa bulshada.

i) Heerka mushahaarka macalinka dugsiga sare ee haysata shahaadada jaamacadeed ee macalinnimada oo dhigaya labo maado. Kani waa heerka ugu sareeya aqoonta macalimiinta, waana mid soo jiidanaya macalimiinta sar sare.
ii) Heerka mushahaarka macalinka dugsiga sare ee aan tababarnayn, kaasoo haysta shahaado jaamacadeed oo aan macalinnimo ahyn.

iii) Heerka macalinka dugsiga hoose ee tababaran (tababar labo sanno oo macalinnimo xarunta ay aqoonsan tahay wasaaradda waxbarashada ee faderaalka ama dawlad goboleedyada.
iv) Heerka macalin dugsi hoose/dhexe oo aan tababarnayn( waxa uu dhamaystay dugsi sare ma helin wax tababar macalinnimo ah)

Maadaama macalin dugsiga hoose/dhexe lagu tababaro muddo kooban oo looga baahan yahay diblooma si uu u noqdo macallin tababaran, waxaa arrin macquul ah in mushahaarkoodu ka yar yahay macalimiinta dugsiga sare ee looga baahan yahay shahaado jaamacadeed, si ay wax uga dhigaan dugsi sare. Sidoo kale, macalinka tababaran ee dugsiga sare waxa uu ka mushahaar badan yahay macalinka dugsiga sare ee aan tababarnayn. Wasaaradda waxbarashada ayaa diyaarinaysa heerka mushahaarka macalimiinta si ay u qaado tilaabo ay ku kala duwayso mushahaarada macalinmiinta oo ku xiran heerarka kor lagu soo sheegay. Si kooban waxaa shaxda hoose lagu muujiyey shahaadooyinka kala duwan ee macalimiinta.

Jaantuska 2.

| Tiro | Shahaadada | Faalo | |
|---|---|---|---|
| 1 | Heerka koowaad ee Jaamacada ee Macalinnimada | Macalin tababaran oo ruqsad u haysa wax ka dhigista dugsiyada sare | Rukhsad |
| 2 | Dibloome macalinnimo | Macalin tababaran oo ruqsad u haysa wax ka dhigista dugsiyada hoose/dhexe | Rukhsad |
| 3. | Heerka kowaad iyo Diblooma Macallinimo | Macallin shahaado jamacadeed kadib qaatay Diblooma Macallinimo (Postgraduate Diploma in Education) | Rukhsad |
| 4 | Shahaado jaamacadeed oo aan macalinnimo ahyn | Macallin aan tababarnayn ee dugsiyada sare | Macallin suge |
| 5 | Shahaadada dugsiga sare | Macalin aan tababarnayn ee dugsiyada hoose/dhexe | Macallin Suge |
| FG: Heerka mushahaarka macalinku ee sare lagu soo sheegay waxaa diyaarinaysa hoggaanka wasaaradda waxbarsahda oo la tashi la samaynaya dhinacyada ay khusayso. | | | |

Maadaama macalimiinta 1 iyo 2 ee sare lagu soo sheegay ay yihiin xirfadlayaal loo tababaray wax barista fasalka, waxay mudan yihiin in aqoontooda sare loo qaado saddexdii sannoba mar, sidoo kale waxa haystaan fursad loogu magacabi karo maamule ku-xigeen, haddii ay leeyihiin khibrad macalinnimo ku filan oo ka badan shan sanno.

### 3.9.1. Heerka Mushahaarka Macalimiinta

Iyada oo ku salaysan tilmaamaha siyaasada ee faqrada 3.8 ee kor lagu soo sheegay, wasaaradda waxbarashadu waxay sheegi doontaa heerka mushahaarka macalimiinta ee u salaysan heerka waxbarashadooda iyo xirfadooda. Agaasimaha guud waxa uu hogaamin doonaa koox ay ka mid yihiin waaxda maaliyada iyo waaxda shaqaalaha, si loo diyaariyo mushahaarka macalimiinta. Wasiirku waxa uu ansix doonaa heerarka mushahaarka macalimiinta. Iyadoo ku xiran tabarta dhaqaale ee dawladda, wasaaraddu waxay qorshayn doontaa fulinta xeerka mushahaarda macalimiinta sida ugu dhaqsiyaha badan.

### 3.9.2. Gunnadda

Maamulayaasha dugsiyda waxa saaran culays weyn oo maamul iyo maareyn iyo macalinnimo. Sidaas darteed, waa arrin jadwalka ka muuqata muuhiimada maamulaha iyo maamule ku-xigeenka u leeyihiin dugsiga. Waa macalimiin tababaran oo xirfad, karti iyo khibrad leh, oo loo adeegsado inay kormeeraan oo tusaaleeyaan macalimiinta cusub ama aan tababarnayn. Sidoo kale waxaa laga sugayaa inay kor u qaadaan tayada waxbarashada ee dugsiyadooda. Sidaas darteed, waa arrin macquul ah in la siiyo lacag gunno ah si loo dhiirigeliyo oo ay si wanaagsan wax u qabtaan. Gunnada maamulayaashu waaxaa soo bandhigii doona wasaaradda Hidaha iyo Tacliinta Sare.

### 3.9.3. Fulinta Siyaasada Mushahaarka

Siyaasadaan waxaa la fulinayaa marka wasiirka waxbarashada ee faderaalka uu dhaqaalaha dalka la tashi kala sameeyo wasiirka maaliyada ee faderaalka. Sidaas darteed, waa lagama maarmaan in la bixiyo mushahaarka macalimiinta sidii loo qoondeeyay. Hay’adaha bixinaya mushahaarka macalimiinta waxa looga baahan yahay inay raacaan siyaasada mushahaarka macalimiinta. Hay’adaha bixinaya mushahaarka macalimiinta aysan shaqaalaysiin wasaaraddu waa in ay bixiyaan mushahaar ku salaysan heerka mushahaarka macalimiinta ee lagu soo sheegay farqada 3.9 ee sare.

### 3.9.4 Siyaasada Dalacsiinta Macalimiinta

Macalinka wanaagsan waxaa loo magacaabayaa maamule ku-xigeen, maamule, ama waxaa darajadooda si kor loogu qaado mushahaaroodu oo ay shaqada ku negaadaan. Waxaa ka mid ah shahaadada, horumarinta xirfada, iyo kartida.

Sida caadiga ah, waxaa jira darajooyinka xirfada macalinnimada. Hadda, sababo dhibaato dhaqaale darteed iyo maamul, macalimiintu waxa ay helayaan mushahaar go’an oo 330 doolar ah bil kasta, laakiin waxaa lagu samayn doonaa dib u habayn sida ugu dhaqsaha badan, marka siyaasadaan la fulinayo. Macalimiinta waxaa mushahaarka lagu siinayaa sida heerka waxbarashadooda ee hoos ku qoran:

i) **Shahaado Jaamacadeed oo Macalinnimo**: Macalinka tababaran ee dugsiga sare ku takhasusay labo maado(major/minor). Xirfadada ay u baahan tahay darajadani waa in la haysto shahaado jaamacadeed oo macalinnimo oo ay bixisay xarun la aqoonsan yahay oo leh khibrad xirfadeed. Haddii macalinku shaqeeyo muddo, dajadoodu kor ayey u kacaysaa si loo dhiirigeliyo oo uu ay ugu negaadaan xirfada macalinnimada. Heerkani waxaa heerka macalimiinta dugsiga sare.

ii) **Shahaadada Jaamacadeed oo aan Macalinnimo ahayn.** Macalimiin badan ayaa haysta shahaado jaamacadeed oo aan macalinnino ahayn, kuwaasoo ka hawlgala dugsiyada sare, iyagoo tusaalayn ka helaya maamulaha ama macalin khibrad leh. Macallimiinta waxaa loo aqoonsaday inay yihiin macalimiin aan tababarnayn, maxaa yeelay ma laha xirfada cashar gudbinta iyo maamulida fasalka, laakiin waxa ay aqoon u leeyihiin maadada, taasoo u ogolaanaysa inay wax ka dhigaan dugsiyada sare ama kuwa hoose/dhexe.

iii) **Shahaado Jaamacadeed oo aan macallinimo ahayn oo ay weheliso dibloome macallinimo (Postgraduate Diploma in Education).** Macallinkan waxaa loo aqoonsanayaa inuu la mid yahay heerka koowaad ee kor ku xusan.

**iv) Macalinka Dugsiga Hoose/dhexe ee Tababaran:** Waxay ay dhammaysteen labo sanno oo tababar macalin dugsi hoose/dhexe ah, waxaana la gudoonsiiyey diblooma macalinnimo.

v) **Macalinka Dugsiga Hoose/dhexe oo aan Tababarnayn:** Waxay dhammaysteen dugsi sare, laakin ma helin wax tababar macalinnimo ah.

Sida caadiga ah, wasaaraddu waxay ay macalimiinta aan tababarnayn ee (ii) iyo (iv) ee sare lagu soo sheegay ku tababari doontaa xirfada wax barista, maamulida fasalka, maamulida/hogaaminta dugsiga, iwm.

Wasaaraddu waxay sannada soo socda ka saari doonta shaqada macalimiinta aan tababarneyn, si ay dugsiyada uga hawl galaan macalimiinta diiwaangashan oo tababaran oo kaliya. Marka macalimiintu ay shaqada ku jirto saddex sanno, waxay ay codsan karaan in ay u gudbaan darajada sare. Waxaa jiri doona tixgelino, sida warbixinta maamulaha dugsiga, warbixinta tayo dhowrka iyo daacadnimada iyo xushmada macalimiinta. Sidoo kale, macalinku waxaa uu u gudbi karaa heerka ugu sareeya marka uu ku guulaysto waxbarashadiisa. Dalacaadu waxa ay iman kartaa marka ay bannaanaato jago hogaamineed, taasoo macalinka loo dalacsiin karo.

**3.9.5 Hogaaminta iyo Maamulida Dugsiga.**

Waxa ay baaritaano badani muujinayaan in tayada maamulka dugsigu looga qiyaas qaadan karo waxbarashada ardayda. Maamulaha wanaagsani waa midka macallimiinta cusub taageera, la taliya, oo saamayn ku yeesha dareenka bulshada, macalimiinta qiimeeya oo ku haga xirfada barista. Wasaaradda waxbarashada heer faderaal iyo heer dawlad goboleed waa inay hubiyaan maamulaha la doortay in uu aqoon u leeyahay habka barista iyo manhajka, oo uu awoodaa inuu caawiyo oo talo siiyo macalimiinta (World Bank, 2013). Sidaas darteed, waxaa looga baahan yahay in cida noqoneysa maamulaha ay leedahay ugu yaraan shan sanno oo khibrad ah(gudbinta manhajka). Sidoo kale khibrada la doorbidayo waa inuu yahay maamule ku-xigeen. Sidaas darteed, qofka noqonaya maamule dugsi waa inuu yahay macalin tababaran oo khibrad macalinnimo leh. Wasaaraddaha waxbarashada ee heer federaal ama gobol waxa ay qiimeyn ku samaynayaan kartida maamul ee maamulka dugsiga. Wasaaraddu ma aqoonsan doonto maamule dugsi oo aan haysan shahaado macalinnimo oo aan lahayn khibrada fulinta manhajka. Dugsiyada gaarka ah, qofkii aan shahaado macalinnimo iyo khibrad lahayn waxaa loo aqoonsanayaa inuu yahay agaasimaha dugsiga, laakiin looma aqoonsanayo inuu yahay maamulaha dugsiga. Sidaas darteed, arrintaan oo kale waxaa laga doonayaa in mulkiilaha dugsigu uu macalin tababaran oo khibrad leh u magacaabo maamulaha dugsiga.

### 3.9.6 Siyaasada Bedelka

Macalinku waxa uu u tilaabsan karaa inuu wax u dhigo heerka waxbarashada ee ka sareeya heerka uu hadda dhigo, sida in macalin wax ka dhiga dugsiyada hoose/dhexe uu u dalaco inuu wax ka dhigo dugsiga sare ama in uu macalinnimada uga gudbo shaqo kale oo dawladeed.

Macalinku waxa uu ka tegi karaa dugsi oo waxa uu aadi karaa dugsi kale oo ay isku heer yihiin, isaga oo soo qoraya warqad codsi ah oo uu ku hagaajinayo guddoonka waxbarashada gobolka, isaga oo u sii marinaya maamulaha dugsiga uu hadda ka shaqeeyo. Macalinka waxaa looga baahan yahay inuu buuxiyo foomka rasmiga ah ee bedelka. Codsiga waxaa loo gudbinayaa waaxda horumarinta macalinka si ay u tixgeliso. Codsiga bedelka waa suurogal in la aqbalo iyo in kale, taasoo ku xiran sababta uu macalinku dugsiga uga bedelanayo, iyo in jago ka bannaan tahay dugsiga uu macalinku doonayo in uu u bedesho, iyo saamaynta uu bedelku ku yeelan karo dugsiga macalinku ka bedelanayo. Marka la eego qodobadaas oo dhan, macalinka waa la bedeli kara, isagoo ku shaqaynaha shuruudihii uu horay ugu shaqayn jiray.

Macalin waxaa uu dooni karaa inuu ka bedesho dugsi hoose/dhexe oo uu bedesho dugsi sare, marka uu helo shahaado jaamacadeed oo u ogolaanaysa inuu wax ka dhigo dugsi sare. Xaaladaas oo kale, macalinku waxa uu codsi u dirayaa waaxda horumarinta macalimiinta si ay u tixgeliyaan codsigiisa. Haddii macalinku buuxiyo shuruudaha bedelka, waxaa macalinka loo ogolaan doona bedelka, waxaase go’aanka iska leh wasaaradda waxbarashada ee faderaalka. Waaxda horumarinta marka ay go’aankaan gaarayso, waxaa

loo baahan yahay inay tixgeliso raadka uu bedelka macalinku ku yeelanayo dugsigii uu ka shaqaynayey. Haddii loo baahdo, dugsigu waxa loo soo bedelayaa cid bedesha macalinka la bedelay.

Sidoo kale macalinka waxaa laga bedeli karaa shaqada macalinnimada, iyadoo loo bedelayo shaqaalaha rayadka ah. Macalinka ma bedelan karo, isaga oo aan marin habraaca saxda ah oo aan helin warqad uu saxiixay xafiiska u xilsaaran bedelka ee goobta uu macalinku ka shaqeeyo.

**3.9.7. Rukhseysi( iscalidda macallinka)**

Macalinka, sida shaqaalaha kale ee rayadka ah, waxa uu ka ruqsaynsan karaa shaqada marka uu doono. Macalinka doonaya inuu ka ruqsaysto shaqada waa inuu bixiyaa bil ogeysiis ah oo uu shaqaynayo. Haddii macalinku uusan bixin bil ogeysiin ah waa in uu bixiyaa mushahaarka bil  oo bedelaysa ogeysiiskii. Marka shaqada laga ruqsaysto, macalinku waa in uu soo celiyaa dhammaan hantidii dugsiga si uu u helo warqad cadayn ah oo uu bixiyo maamulaha dugsiga.

**3.9.8. Fasaxa Dugsiyada.**

Macalimiintu waxa ay leeyihiin fasax sida shaqaalaha rayadka ah oo kale, laakiin fasaxu waa inuu noqdaa marka dusgigu xiran yahay laga bilaabo 1 June ilaa 31 July ee sannad kasta. Macalimiinta waa loo arkaa inay shaqo ku jiraan marka uu dugsigu xiran yahay. Macalimiinta fasaxa raba inta uu dugsigu xiran yahay waa inay horey u sii ogeysiiyaan maamulaha dugsiga, inay safrayaan fasaxa dugsiga. Kaasna waxaa loo tixgelinayaa fasaxa rasmiga ah ee macalinku leeyahay sannadka. Sidoo kale, fasaxyada gaarka ah sida umusha, xanuunka iyo fasaxa aan mushahaar lahayn waxa lagu bixinayaa baahida jirta. Macalimada dumarka ah waxa ay leedahay afar bilood oo fasax dhalmo, halka aabuhu xaaskiisu umushay  uu ka leelanayo labo usbuuc oo fasax ah. Macalin kasta oo u baahan fasaxyada gaarka ah, waxa uu helayaa foomka codsiyada, oo uu ku qorayo sababta uu fasaxa u qaadanayo, isagoo ku lifaaqaya wixii cadaymo ah.

**3.9.9. Fasax Waxbarashado**

Macalinku waxa uu codsan karaa fasax waxbarashao markasta, laakiin codsigu waxa uu ku xiran yahay qiimaynta ay sameeyaan waaxda horumarinta macalinka oo tixgelinaysa codsiga. Marka codsiga loo arko mid la aqbali karo, macalinka waxa la siinayaa fasax aan mushahaar lahayn ama mid mushahaar leh, iyadoo ku xiran waxbarashda iyo xaalada taagan. Xaalada waxaa dib u eegis lagu samaynayaa xilliyo kala duwan, iyadoo la tixgelinayo waxyaabo badan sida helida dhaqaaha iyo kuwo kale. Waaxda horumarinta waxa ay leedahay awood ay ku go’aaminayso muddada fasaxa waxbarashada, iyadoo tixgelinaysa muddada waxbarashada ee macalinka doonaya. In la bixiyo fasax waxbarasho oo mushahaar la bixiyo ama

aan mushahaar la bixin waxa ay ku xiran tahay qiimaynta ay sameeyso waaxda horumarinta macalimiinta. Macalinkii fasax u qaata waxbarasho macalinnimo waxa la siinayaa fasax la bixinayo mushahaar, kaasoo ku xiran go'aanka wasaaradda waxbarashada ee heer faderaal ama dawlad goboleed.

### 3.9.9.1 Hab-dhaqanka Macalinka

Soomaalidu waa dad muslim ah oo qiyamkeedu uu ku salaysan yahay barashada diinta islaamka iyo dhaqankeeda. Sidaas darteed, waxaa lagama maarmaan ah in qof kasta oo lagu aaminay inuu danta caamka ah u shaqeeyo waa inuu xurmeeya sharciga dalka, xeerarka iyo tilmaaha. Macalimiinta iyo dadka kale ee wax bartay kama baxsana xeerkaan.

Xirfad-lahaanshaha, daacadnimada, iyo edebsanaanta waa qaybaha muhiimka ee macalinku ku metalo bulshada uu ka dhex shaqaynayo. Kaalinta macalinku kuma koobna oo keliya fulinta manhajka qaranka, laakiin waa ay hormuud u noqdaan ardayda iyo bulshada ay u shaqaynayaan. Dhab ahaan waxaa macalinka lagu tilmaami karaa inuu yahay waalidka caruurta uu wax u dhigayo, kuwaasoo dugsiga loo geeyey in lagu xanaaneeyo. Sidaas darteed, in la ogaado dabeecada macalin waa qayb ka mid ah gudbinta iyo horumarinta tayada waxbarashada. Macalinka dabeecada xun waxa uu saamayn xun ku leeyahay xirfadiisa iyo natiijada ardayda.

Siyaasada waxaa ka mid ah habka loo marayo ciqaabta, marka uu macalinku jabiyo xeerka hab dhaqanka macalinka(fiiri faqrada 10.0 ee soo socota). Ujeeddada guud ee siyaasadu waa in la abuuro hab dhaqanka wanaagsan iyo xirfadda macalimiinta ka shaqaynaya dugsiyada oo dhan. Dhamman macalimiinta ka shaqaynaysa dugsiyada caamka ah waxaa laga rabaa inay saxiixaan warqad ay ku cadaynayaan fulinta xeerka hab-dhaqanka macalinka, kaasoo lagu kaydinayo xarunta dhexe ee wasaaraddaha waxbarashada ee faderaalka ama dawlad goboleedyada. Macalimiinta ka shaqaysa dusgiyada gaarka ah waxaa laga rabaa inay saxiixaan cadeynta ku saabsan dhaqan gelinta xeerka hab dhaqanka macalin oo dugsiyada ay ka shaqeeyaan lagu kaydiyo.

Macalin kasta waxaa laga rabaa inuu raaco sharciga dalka, xeerka waxbarashada, xeerka hab-dhaqanka macalinka, siyaasada dalka, xeerarka shaqaalaha rayadka ah, siyaasada dugsiyda iyo wixii kale oo sharci ah oo ka xiriira waxbashada.

***Dhaqan-xumada xirfadeed ee macalinku ku kici karo waxaa ka mid ah:***

a) In uu si ula kac ah u diido amar uu siiyey qof awood u leh in uu amarkaas bixiyo.

b) In uu dayaco waajibaadkiisa

c) Inuu adeegsado daroogo oo ay hoos u dhacdo xirfadiisa iyo kartidiisa.

d) Ku xadgudub awoodeed oo uu u adeegsado, shaqaalaha, macalimiinta ama ardayda.

e) In uu ka hoos maro heer hawl-gudashada iyo akhlaaqda.

f) Inuu shaqada ka maqnaado fasax la'aan

g) In uu fal dambiyeed ku galo dugsiga dhexdiisa ama dibadiisa

h) Xiriir galmo oo uu la yeesho ardayda.

### 3.9.9.2. Dawrka iyo Mas'uuliyahada Macalinka, Ardayga, Waalidka ee siyaasadaan

#### A) Macalinka

Macalimiintu waxaa xil ka saaran yahay sidii ay u dhowri lahaayeen sharaftooda, madaamda ay xirfadlayaal yihiin oo ay xanaaneeyaan ardayda ay u adeegayaan, sidaas darteed waa in ay leeyihiin akhlaaq heer sare ah. Waxa ay u xilsaaran yihiin inay ka soo warbixiyaan wax kasta oo baal masran sharciga dalka, xeerarka kale ee macalimiinta. Waxa ay macalimiintu leeyihiin waajibaad ah in ay caruurta wax baraan oo xanaaneeyaan. Sidoo kale waxay kor u qaadayaan bedqabka, ixtiraamka, saaxiibtinimada iyo jawi ay ardaydu xudun u yihiin habka wax barista ee dugsiga.

Macalimiintu waa inay ku wargeliyaan maamulaha dugsiga wax kasta oo fal dambiyeed ah si uu tilaabo uga qaato ama ay boolisku u baaraan. Arrimahas waxaa ka mid ah in caruurta la dilo, faraxumayn, iwm. Labadaan arrimoodba waa fal dambiyeed u baahan in boolisku baaro.

#### B). Maamulaha Dugsiga

Maamuluhu waa inuu si hagaagsan u maamulaa dhammaan hawlaha dugsiga oo ay ka mid yihiin xalinta dhaqan xumada macalimiinta. Maamulaha waxa kale oo uu u xilsaaran yahay inuu la shaqeeyo guddiga waxbarashda bulshada(GWB) si uu u maareeyo akhlaaqada wanaagsan ee dugsiga. Maamuluhu waa in uu hubiyaa dukumiinta ku saabsan hab-raaca hab-dhaqanka macalimiinta in uu dugsigu leeyahay, sidaas darteed macalimiintu waxa ay ogaan karaan waxa laga filayo, haddii uu khalad ka dhaco, sida ku cad dukumiintiga iyo inay sameeyeen guddiga anshaxa oo ka kooban macalimiinta khibrada leh iyo guddiga waxbarashada bulshada si ay u xaliyaan khaladaadka yar yar ee dhaqanka iyo akhlaaqda ku saabsan, iyagoo adeegsanaya istiraajiyado badan oo ay ku hagaajinayaan hab dhaqanka macalin, kuna dhowrayaan xuquuqda ardayda.

Maamuluhu waa in uu booliska ku wargeliyaa fal dambiyeedyada culus oo uu kaalin firfircoon ka qaataa baaritaanka booliska.

#### C) Ardayda

Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin in ay wax ku bartaan meel bedqabta, sidaas darteed waxay xaq u leeyihiin inay waalidkood, maamulaha dugsiga ama cid ka mid ah guddiga waxbarashada bulshada u sheegaan wax kasta oo dhaqan xumo ah oo ay macalimiintu samaysao.

Dugsigu waxa uu u xil saaran yahay in uu si aan eex lahay u baaro dhammaan cabashada ardayda oo arrintaas si dhab ah u qaato.

Ardayda cabashada ka soo jeediya macalimiinta waxay u baahan yihiin in la qariyo oo la hubiyo cida ay ka cabanayaan.

**D) Waalidka**

Waalidiinta iyo bulshada waxa ay ka rajaynayaan macalimiinta daacadnimo iyo xirfada si ay caruurta u ilaaliyaan. Waajibaadkoodu waa inay hubiyaan in macalimiintu ay u dhaqmayaan si wanaagsan dugsiga gudihiisa iyo dibadiisa iyo bulshada dhexdeeda. Waa in ay indha indheeyaan dhaqan xumada macalimiinta oo ay u soo gudbiyaan maamulaha si uu tilaabo uga qaado macalinka khaladka galay ama boolis ay ku war geliyaan haddii dambigu culus yahay. Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay nuqul ka helaan baarista boolisku sameeyey ee la xiriirta cabashadooda. Haddii macalin uu ku kaco fal dambiyeed culus, waalidiintu waxay si toos ah ugu gudbin karaan arrintaas ama maamulka sare ee waxbarashdad ee degaankaas. Haddii ay dhacdo faro xumayn, waa in ay waalidku ku wargeliyaan booliska iyo maamulka dugsiga.

**E) Guddiga Anshaxa**

Guddiga anshaxa waxaa laga soo dooran qaybo kala duwan si ay u xaliyaan hab-dhaqan xumada macalinka. Dugsigu waxa uu yeelan karaa guddiga anshaxa oo laga soo xulay xubnaha maamulka iyo guddiga waxbarashada bulshada. Waxaa lagu talinayaa, in arrimaha fud-fudud dugsi ahaan loo xaliyo. Guddigaasi waxa ay xalin karaan dembiyada ay macalimiintu galaan. Dembiyada khatarka waxaa loo gudbinaya guddiyo sare sida caadiga ah waaxda horumarinta macalimiinta oo arrintaas dhegaysta, ka dibna go’aan ka gaarta.

Marka guddiyada anshaha ee dugsiyadu ay xaliyaan oo go’aan ka gaaraan dembi lid ku ah macallin, waxaa loo gudbinayaa waaxda horumarinta macalimiinta. Warbixnadaas oo kale waa inay ku jiraan dukumiintiyada:

i) Cabasho
ii) Foomka lagu qoro waxa laga cabanayo macalinka
iii) Warbixinta baaritaanka
iv) Waxayaabaha laga marag kacay
v) Fal-celinta macalinka
vi) Warbixinta guddiga anshaxa
vii) Warbixinta guddiga sare

Guddiga anshaxu waxaa uu ka kooban yahay waaxda horumarinta adeega waxbarashada, waaxda shaqaalaha oo awoodu leh inay sida ugu dhaqsiyaha badan ula hadlaan macalin kasta oo lagu soo eeday arrin anshax xuno la xiriirta. Guddigu waxa uu aqbali karaa, diidi karaa ama wax ka bedel ku samayn karaa go'aanka ay soo gaareen guddiyada hoose ee heer dugsi. Go'aanka guddigaan waxaa lagu wargelinayaa macalinka ay khusayso, iyo dugsiga iyo guddiga anshaha dusgiga, isaga oo qoraal ah.

**3.9.9.3 Ka Joojinta iyo Ka Eryida Shaqada ee Macalinka**

Macalinka waxaa ka joojin kara ama ka eryi kara waaxda horumarinta macalimiinta ee tixraacaysa fal-dambiyeedyada is daba jooga ee u galay macalinku. Shaqo ka joojintu waxa ya dhici kartaa ka hor ama ka dib marka ay guddiga anshaxa fariistaan. Shaqo ka joojinta waxaa dib uga noqon kara guddiga anshaxa marka ay arrinta baaraan oo xog helaan. Ilaa macalinka dembi lagu xukumayo, waxaa uu helayaa mushahaarkiisii oo laga jaray wixii ay ka goysay waaxda horumarinta adeega bulshada.

**A) Tilmaamha Anshaxmarinta Macalimiinta**

I. Macalinka waxaa shaqada ka joojin karta waaxda horumarinta adeega waxbarsahda oo la tashanaysa agaasimaha guud ee wasaaradda waxbarashada ee faderaalka marka ay dhacaan falal anshax xumo ah ama jebinta hab-dhaqan, siyaadada amd habraacyada.
II. Shaqo joojintu waxa ay dhici kartaa ka hor ama ka dib inta aan xukunka la gaarin, waxaa dib u qaadi kara waaxda horumarinta adeega waxbarashada, iyo cida awooda loo siiyey inay macalinka shaqada ka joojiso.
III. Muddo afar iyo toban maalmood gudahood ayaa dacwada lagu soo oogayaa, haddii kale waxa buraya shaqo ka joojinta.
IV. Waaxda horumarinta adeega waxbarashadu waxa ay ansixin kartaa in la balaariyo muddada shaqo joojinta oo ay ka dhigi karto saddex bilood.
V. Shaqo ka joojinta waa la qaadayaa haddii aan macalinka dacwad lagu soo oogin , dacwaduna ma jirayso haddii shaqo joojintii la qaaday.
VI. Shaqa joojinta waxaa la bixinayaa mushahaarka, arrin kasta oo la xiriirta siyaasadda hab-dhaqanka iyo hab raacyada marka laga reebo, marka macalinku lagu xukumo fal dembiyeed ama waaxda horumarinta adeegsa waxbarashadu ay amarto shaqo joojin aan mushahaar lahayn.
VII. Haddii macalinka lagu xukumo fal dembiyeed, waxaa macalinka shaqada ka joojinaya waaxda horumarinta adeega waxbarashada.

**3.9.9.4. Xubinnimada Macallimiinta ee Ururada Shaqaalaha.**

Si loo ilaaliyo xaquuqdooda, iyo sharuudaha shaqaalenimada, macalimiintu waxay xubin ka noqon karaan ururada shaqaalaha/macalimiinta oo ka diiwaan gashan wasaaradda arrimaha guddaha iyo wasaaradda qorshaynta iyo xiriirka caalamiga ee dawlad faderaalka ee Soomaaliyeed. Ururada shaqaaluhu waa inay ay diiwangelintooda la wadaagaan wasaarada waxbarashada. Ujeeddada laga leeyahay in xubin laga noqdo ururada shaqaaluhu waa ina la maqlo codka macalinka oo ay cadahay shuruudaha iyo xeerarka

shaqaalenimda, saacadaha shaqada iyo wixii kale ee xaquuq ah. Ururadu waxay ka qayb qaadan karaan u qareemidda macalimiinta. Xubin kasta waa inay bixiso dhaqaalaha xubinnimada, iyadoo lagu bixinayo qaabka lagu heshiiyey.

**3.9.9.5 Fulinta Siyaasada Macalinka**

Siyaasadaan oo lagu sameeyey habka ka qayb galka, waxay tixgelisay, bulshada, iyo dhaqaalaha dalka. Waxaa la og yahay in waxbarashadu ay u baahan tahay dhaqaale badan, sidaas darteed waxaan xoogga saaraynaa fulinta siyaasadaan. Ujeeddada siyaasadaan loo sameeyey waa in la dhaqan geliyo. Dadka Soomaaliyeed kuma dhiirana inay maal gashadaan waxbarashada, si looga dhabeeyo riyooyinka caruurta. Dawladu waxay ka jawaabaysaa baahida loo qabo macalimiinta, ururada shaqaaluhuna waxay hormarinaan shuruudaha shaqada.

Waxaa lagu talinaa qorshe si taxader leh loo dejiyo si loo fuliyo siyaasada macalinka oo la saanqaadaysa qorshaha istiraajiyada waxbarashada. Waaxda qorsheynta iyo siyaasadda ayaa samayn doonta jadwalka fulinta siyaasada macalimiinta oo ay la wadaagi doontaa wasaaradda waxbarashada ee faderaalka, si ay u hubiso in la raacay jadwalkii fulinta siyaasada, iyadoo lacag la weydiisanayo wasaaradda maaliyada, taasoo loogu talo galay mushahaarka macalimiinta, dalacaada iyo tababarada macalimiinta ee loo baahan yahay.

Intaas ka dib, waxaa xigi doona kormeerka iyo qiimeynta shaqada fulinta si loo hubiyo in la gaaray ujeeddoyinkii laga laha siyaasada macalimiinta.

## <u>4.0. Gabogabo</u>

Nidaamkeena waxbarasho ee dhismuhu ku socdo, waxa kaliya ee uu ku guulaysan karaa in arday kasta oo Soomaaliyeed uu haysto macalin tababaran, firfircoon, karti leh, iyo in la caawiyo macalimiinta si ay uga dhabeeyaan riyada arday kasta ee ah inuu ku wanaagsanaado hiigsiga waxbarashada. Muhiimada macalinka darteed, wasaaradda waxbarashada ee faderaalku waxay si wada tashi leh ku samaysay siyaasada qaran ee macalimiinta, taasoo hagaysa horumarinta iyo maamulida macalimiinta, kuwaasoo loo aqoonsaday inay yihiin waxa ugu qiimaha badan ee waxbarashada ka shaqeeya. Siyaasadu waxa ay sheegtay caqabadaha ay la kulmaan macalimiinta maanta shaqaysa, sida mushahaar yari, taageero la'aan, horumar la'aan dhinaca xirfada shaqada, iyo kuwo kale. Siyaasadu waxa ay hagaysaa sida loo diyaarinayo macalimiinta iyo waxyaabha looga baahan yahay kuwa ku soo galaya xirfada macalinnimada ee dugsiyada hoose/dhexe ama sare. Waxay kaloo siyaasadu bixinaysaa hab raac ku saabsan diiwaangelinta, shaqaalaysiinta, mushahaarka macalimiinta, hawlgelinta macalimiinta iyo waxyaabo kale oo la xiriira maamulka sida hogaaminta iyo maamulida.

## Tixraacyada

Ministry of Education, Culture and Higher Education,2020.The Education Act.

Ministry of Planning, Federal Government of Somalia 2020,The National Development Plan (2015-2020).

MoECHE 2017,ESA and ESSP(2018-2021)

UNESCO 2015 Policy Development Guide.

UNESCO Sustainable Developmnet Guide (SDG4) (2015)

World Bank 2013- What matters most for Teacher Policies: A framework Paper.

Excerpts from teachers, Head Teachers, MoECHE/FMS MoE Policy Makers, Teachers' Union.